
HABEENNADII CADDADA

FYODOR DOSTOEVSKY



Turjuma: Cabdi Xakiin Sh. Nuur Muuse

HABEENNADII CADDADA

Fyodor Dostoevsky

Turjumaaddii

Cabdi Xakiin Sh. Nuur Muuse

HABEENNADII CADDADA

Qoraaga: Fyodor Dostoevsky

Turjumaadda: Cabdi Xakiin Sh. Nuur Muuse

Xuquuqda turjumaadda © 2026 Cabdi Xakiin Nuur Muuse.
Xuquuqda oo dhan way dhowrsan tahay.

Buuggani waa turjumaad Af-Soomaali ah oo laga soo turjumay qoraalka Ingiriisiga ee *White Nights* ee Constance Garnett. Turjumaaddan waxaa si madax-bannaan u diyaariyey Cabdi Xakiin Nuur Muuse.

Xuquuqda turjumaaddan Soomaaliga ah, oo ay ku jiraan qoraalka turjuman iyo qaabka suugaaneed ee loo gudbiyey. Waxaa iska leh turjumaanka.

Lama oggola in buuggan ama qayb ka mid ah turjumaaddiisa la koobiyeeyo, dib loo daabaco, dib loo qaybiyo, ganacsi ahaan loo iibiyo, ama loo adeegsado mashruuc kale iyada oo aan oggolaansho hore oo qoraal ah laga helin turjubaanka, marka laga reebo isticmaalka sharcigu oggol yahay, sida xigashooyin kooban oo loo adeegsado faallo, dib-u-eegis ama cilmi-baadhis.

Xiriirka turjubaanka:

Email: hakimabdi206@gmail.com

Daabacaadda koowaad ee turjumaadda Af-Soomaaliga, 2026.

TUSMADA GUUD

HORDHAC 1
HABEENKII KOWAAD 6
HABEENKII LABAAD 22
TAARIIKHDA NASTENKA 43
HABEENKII SADDEXAAD 59
HABEENKII AFRAAD 68
SUBAXDII 82

HORDHAC

Buuggan yar ee aad hadda gacanta ku hayso waa tarjumaad af Soomaali ah oo laga sameeyey mid ka mid ah sheekooyinka gaagaaban ee ugu qiirada iyo xusuusta badan suugaanta Ruushka: *White Nights* (*Habeennadii Caddada*), oo uu qoray qoraaga weyn ee Ruushka ah **Fyodor Dostoevsky**.

Dostoevsky wuxuu ka mid yahay qoraayaasha suugaanta adduunka ugu saamaynta badan. Qoraalladiisa waxaa si gaar ah loogu yaqaannaa inuu si qoto dheer u baadho gudaha nafta aadanaha—kalinimada, jacaylka, rajada, dambiga, murugada, iimaanka, iyo su'aalaha adag ee qofku naftiisa weydiiyo marka uu la kulmo nolosha. *Habeennadii Caddada*, inkastoo ay tahay sheeko gaaban, haddana waxay xambaarsan tahay qaar badan oo ka mid ah mawduucyadaas.

Sheekadu waxay inoo soo bandhigaysaa nin aan magaciisa la sheegin, oo ku nool nolol ay ku badan tahay kalinimo iyo riyooyin. Wuxuu leeyahay adduun u gaar ah oo aad u ballaaran, laakiin xiriirkiisa dadka kale waa mid aad u kooban. Wuxuu ku nool yahay riyooyin, mala-awaal iyo sheekooyin uu naftiisa la yeesho, ilaa habeen uu si lama filaan ah ula kulmo gabadh la yiraahdo *Nastenka*. Kulankaas kooban wuxuu noloshiisa gelinayaa dareen cusub oo uusan hore u aqoon—rajo, saaxiibtinimo, jacayl iyo cabsi isku dhex jira.

Waxa sheekadan ka dhigaya mid gaar ah ma aha oo keliya dhacdooyinka ku jira, balse waa sida Dostoevsky uu u sawirayo *qalbiga qofka kelinimada dareemaya*. Waa sheeko qof kasta oo mar uun dareemay in dunidu ku hareeraysan tahay dad badan, haddana uu gudaha ka yahay qof cidlo ah uu fahmi karo. Mararka qaarkood qofku wuxuu u baahan yahay hal kulan oo keliya, hal wada

sheekeysi oo daacad ah, ama hal qof oo si dhab ah u dhageysta, si uu u dareemo in aanu gebi ahaanba keligiis ahayn.

Waxaa laga yaabaa in akhristaha Soomaaliga ahi uu ninkan riyoonaya ka dhex arko qayb ka mid ah naftiisa. Waxaa laga yaabaa inuu yahay qof si qoto dheer u dareema, balse aan si fudud dadka ugu sheegi karin waxa qalbigiisa ku jira; qof ku nool xusuus iyo rajo; qof jecel isagoo ka baqaya in jacaylkiisu aanu noqon mid la isu celiyo; ama qof mar uun la kulmay qof noloshiisa iftiin yar ku soo kordhiyey, dabadeedna uu ogaaday in iftiinkaas uusan weligiis sii waarin.

Taasi waa mid ka mid ah sababihii igu dhiirrigeliyey inaan sheekadan u tarjumo af Soomaali. Suugaantu ma aha oo keliya erayo la isku xiro; waa dareen, waayo-aragnimo iyo aragti nololeed. Qoraalku wuxuu awood u leeyahay inuu qof ku tuso naftiisa isagoo adeegsanaya nolol uu qof kale qoray. Sidaas darteed. Waxaan jeclaystay in sheekadan uu

Dostoevsky qoray qarniyo ka hor ay hesho fursad ay kula hadasho akhristaha Soomaaliyeed afkiisa hooyo.

Tarjumaaddu, se, ma aha hawl fudud. In sheeko laga soo qaado luqad iyo dhaqan kale, dabadeedna lagu soo gudbiyo af Soomaali iyadoo la ilaalinayo macnaha, dareenka, codka qoraaga iyo quruxda suugaaneed, waa hawl u baahan dulqaad iyo taxaddar. Mararka qaarkood erayga ugu dhow macnaha asalka ahi ma noqonayo erayga ugu quruxda badan af Soomaaliga; mararka kalena jumlad si sax ah loo turjumay ayaa laga yaabaa inay lumiso dareenkii ku jiray asalka. Sidaas darteed, inta aan ku guda jiray tarjumaaddan. Waxaan isku dayey inaan dheellitiro macnaha asalka ah iyo dabiicinnimada af Soomaaliga, si qoraalku uusan u noqon erayo si toos ah loo beddelay oo keliya, balse uu u noqdo sheeko Soomaali lagu akhrisan karo, laguna dareemi karo.

Waxaa si gaar ah iigu adkaatay qaybaha uu **Dreamer-ku** kaga warramayo naftiisa, noloshiisa iyo dunida mala-awaalka ah ee uu

gudaha ka dhistay. Qaybahaas, Dostoevsky mararka qaarkood ma adeegsanayo hadal toos ah oo keliya; wuxuu isku dhex daraa fikir, xusuus, riyo, dareen iyo mala-awaal, iyadoo hadalku mararka qaar u muuqdo inuu si dabiici ah uga soo qulqulayo maskaxda qofka sheekada ka warramaya. Sidaas darteed, eray kasta ma laha macne keliya oo qaamuus laga soo qaadan karo. Mararka qaarkood macnaha dhabta ahi wuxuu ku jiraa sida uu qofku u dareemayo waxa uu sheegayo, halkii uu ku jiri lahaa erayada oo keliya.

Tani waxay ahayd mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee tarjumaadda. Erayo ama weedho laga yaabo inay luqadda asalka ah ku xambaarsan yihiin dareen gaar ah, marka si toos ah loogu beddelo Soomaali waxay lumin karaan xarragadii iyo codkii qoraaga. Sidoo kale, Dreamer-ku waa qof hadalkiisu ka tarjumayo dabeecaddiisa—qof aad u fikir badan, xasaasi ah, riyoonaya, mararka qaarkoodna ku dhex wareersan adduunka uu isagu maskaxdiisa ka sameystay. Sidaa darteed, ujeeddadaydu ma ahayn oo keliya inaan akhristaha u gudbiyo waxa uu yiri, balse sidoo kale inaan isku dayo inaan u gudbiyo sida uu u dareemayey markii uu yiri.

Qaar ka mid ah eray-bixinnada iyo sawirrada suugaaneed ee ku jira sheekadana si fudud looguma heli karo hal eray oo Soomaali ah oo si buuxda u gudbinaya macnahooda. Xaaladahaas. Waxaan doorbiday inaan mararka qaarkood ka fogaado tarjumaad eray-eray ah, oo aan doorto weedh Soomaali ahaan dabiici u ah, balse weli ilaalinaysa ruuxda iyo macnaha qoraalka. Waxaan aaminsanahay in tarjumaad suugaaneed oo wanaagsan aysan ahayn in ereyada keliya la beddelo, balse ay tahay in dareenka qoraalka laga raro hal af oo loo raro luuqad kale.

Waxaan sidoo kale ogahay in tarjumaaddani aysan ahayn mid ka madhan khaladaad ama gaadhaysa heer qummanaan luqadeed iyo suugaaneed. Af kasta wuxuu leeyahay quruxdiisa iyo xuduudihiisa, tarjume kastana wuxuu leeyahay doorashooyin uu

mararka qaarkood ku khasbanaado inuu sameeyo. Sidaas darteed. Waxaan si xushmad leh uga cudur daaranayaa khalad kasta oo akhristuhu ka helo qoraalkan. Waxaan soo dhoweynayaa in tarjumaaddan loo arko isku day daacad ah oo lagu doonayo in suugaanta caalamiga ah loogu soo dhoweeyo akhristaha Soomaaliyeed.

Waxaan si gaar ah u rajaynayaa in buuggani uu gaaro dhalinyarada Soomaaliyeed iyo dhammaan dadka jecel suugaanta, gaar ahaan kuwa aan fursad u helin inay Dostoevsky ku akhriyaan luqaddiisa asalka ah ama tarjumaadaha kale ee caalamiga ah. Haddii tarjumaaddani ay qof Soomaaliyeed ku dhaliso inuu jeclaado Dostoevsky buugtiisa, inuu akhriyo suugaan badan, ama xitaa inuu is weydiiyo su'aalo cusub oo ku saabsan naftiisa iyo nolosha, markaas dadaalkaygu wuxuu helay macnihiisii.

Habeennadii Caddada sidoo kale waa xusuusin in farxadda aadanuhu mararka qaarkood aysan ku xirnayn muddada ay wax socdeen. Qof wuxuu noloshaada ku jiri karaa sannado, qof kalena wuxuu ku jiri karaa maalmo ama xitaa habeenno kooban, haddana raadkiisu wuxuu qalbigaaga ku sii jiri karaa muddo dheer. Waxaa jira kulammo gaagaaban oo nolosheena ku noqda xusuuso aan sannado badan ilaashanno.

Sidaas darteed, akhristaha qaaliga ah. Waxaan kaa codsanayaa inaad sheekadan ugu akhrido *dulqaad, degganaan iyo qalbi furan*. Ha u akhrin oo keliya si aad u ogaato waxa ku dhacaya jilayaasha; isku day inaad dhegaysato waxa ay qalbiyadoodu sheegayaan. Waxaa laga yaabaa inaad dhexdeeda ka hesho murugo aad hore u taqaanay, rajo aad weli sidato, jacayl aad xasuusato, ama qayb naftaada ka mid ah oo aanad weli erayo u helin.

Waxaan uga mahadcelinayaa **Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa**, oo ii fududeeyey inaan hawshan dhammeeyo, sidoo kalena waxaan si weyn ugu mahadcelinayaa akhristaha waqtigiisa, dulqaadkiisa iyo xiisaha u qaba afka iyo suugaanta Soomaaliga.

Ugu dambayn. Waxaan rajaynayaa in *Habeennadii Caddada* ay kuu noqdaan wax ka badan sheeko aad akhriday. Waxaan rajaynayaa inay kuu noqoto habeen aad dareentay, qof aad fahantay, iyo xusuus aad la sii socotay—xitaa haddii sheekadu ay noloshaada ku qaadato oo keliya dhowr habeen.

— Tarjumaha: Cabdi Xakiin Sh. Nuur Muuse

HABEENKII KOWAAD

Waxay ahayd habeen cajiib ah, habeen noocaas ah oo aan la heli karin marka laga reebo xilliga dhallinyaranimada, akhristaha qaaliga ahow. Cirka xiddigo ayaa ka buuxay, aadna wuu u iftiimayey, sidaa darteed marka qofku uu cirkaas eego, waxa suurtagal ah inuu isweydiiyo: ma suurtagal baa in dadka niyada xun oo dabeecada qallafsan ay ku hoos noolaadaan cir sidan oo kale ah? Taasina waa su'aal curdan ah, akhristaha qaaliga ahow—su'aal ugub ah; laakiin Ilaahay ha ka dhigo mid su'aashaas marar badan qalbigaaga ku soo dhacda!...

Anigoo ka hadlaya dadka dabeecada qallafsan iyo kuwa niyada-xun, kama ahaan karo inaan xusuusto xaaladdii nafsadeed ee aan maalintaas ku jiray. Laga soo bilaabo aroortii hore. Waxaa i dul saarnaa niyad-jab aan caadi ahayn.

Si kedis ah ayay iigu muuqatay inaan keligay ahay, in qof kastaa iga tegayo oo iga sii fogaanayo. Dabcan, qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu isweydiiyo marka aan dhahay "qof kastaa." Waayo, inkastoo aan ku dhowaad siddeed sano ku noolaa Petersburg, haddana waxaan lahaa dad aan isbarannay oo aad u yar. Laakiin maxaan uga baahnaa dad aan isbaranno? Petersburg oo dhan ayaan aqaanay sida ay ahayd; taasina waxay ahayd sababta aan u dareemayey sidii in dhammaantood iga tegayaan markii Petersburg oo dhan alaabtooda xidhxidheen oo u baxeen xagaaga.

Waxaan ka baqayay in kaligay la iga tago, saddex maalmood oo dhammaystiranna waxaan magaalada dhex mushaaxayay anigoo niyad-jab weyn ku jira, mana garanayn waxaan naftayda ku mashquuliyo. Haddii aan Nevsky ku socdo, Jardiinooyinka tago ama aan jiinka webiga ku meeraysto, ma arkin xitaa hal weji oo ka mid ah wejiyadii aan caadaystay inaan sannadka oo dhan isku waqti iyo isku meel ku arko. Dabcan, iyagu ima yaqaannaan, laakiin anigu

waan aqaan. Si fiican ayaan u aqaan, marar badan daraasad ayaan ku sameeyey wejiyadooda, waana ku farxaa marka ay faraxsan yihiin, waanan murugoodaa marka ay murugo ku jiraan.

Waxaan saaxiibtinimo la yeeshay oday aan maalin kasta, saacad isku mid ah, kula kulmo Fontanka. Wejigiisu waa mid kakkan oo feker badan ka muuqdo; mar walba naftiisa ayuu hoos ula hadlaa, gacantiisa bidixna hawada ayuu ku lulayaa, halka gacanta midigna uu ku hayo ul dheer oo qalloocan, oo madax dahab ah leh. Isaguna wuu i dareemaa, xiiso diiranna wuu ii hayaa. Haddii ay dhacdo inaanan waqtigii aan caadaysanay joogin isla goobtaas ee Fontanka. Waxaan hubaa inuu niyad-jabayo.

Sidaas awgeed. Waxaan isku salaannaa madaxa, gaar ahaan marka labadeenuba xaalad wanaagsan ku jirno. Maalintii dhoweyd, markii aynaan laba maalmood is arag oo aan maalintii saddexaad kulannay, runtii waxaan bilownay inaan koofiyadaha iska salaanno, laakiin markii aan waqtigii ku baraarugnay, gacmahayagii ayaan hoos u dhignay, annagoo midba midka kale si xiiso leh u eegayna ayaannu iska gudubnay.

Guryahana waan aqaan. Markaan waddooyinka dhex marayo, waxay ila tahay inay waddada ku soo ordayaan si ay daaqad kasta iiga soo eegaan, oo ay ku dhowaadaan inay yiraahdaan: "Subax wanaagsan! Sidee tahay? Anigu aad baan u fiicanahay, Ilaahay mahaddiis, bisha Maarso dabaq cusub ayaa la ii kordhinayaa"; ama, "Sidee tahay? Berri ayaa la ii qurxinayaa"; ama, "Waxaan ku sigtay inaan gubto oo cabsi badan ayaan soo maray," iyo hadallo la mid ah.

Waxaan leeyahay guryo aan si gaar ah u jeclahay, qaarkoodna waa saaxiibbaday qaali ah; mid ka mid ahna wuxuu damacsan yahay in xagaagan uu gacanta injineer dhisme galo. Maalin kasta ayaan si ula kac ah u tegi doonaa si aan u hubiyo inaan hawshaasi fashilmin. Ilaahay ha nagu dhowree!

Laakiin weligay ma illoobi doono dhacdo igu dhacday; guri yar oo aad u qurux badan, midabkiisuna ahaa casaan khafiif ah. Wuxuu ahaa guri yar oo leben ah oo aad u soo jiidasho badan; si marti-soor leh ayuu ii soo eegi jiray, deriskiisa foosha xun si kibir leh ayuu uga kor eegi jiray, sidaas darteed qalbigaygu wuu farxi jiray mar kasta oo aan agtiisa maro.

Laakiin toddobaadkii hore, anigoo waddada maraya, ayaan saaxiibkay eegay, markaas waxaan maqlay isagoo si murugo leh u dhahaya: "midab Jaalle ayay igu rinjiyeynayaan!"

Nacasyadaas! Barbariyiintaas! Waxba may reebin—tiirar, qurxinno, waxba! Saaxiibkaygii yaraa ee miskiinka ahaa wuxuu noqday jaalle sida shinbirka kanariiga. Xataa calooshayda ayay qasday.

Ilaa maanta, kuma aan dhiirran inaan booqdo saaxiibkaygii miskiinka ahaa ee wejigiisa la beddelay, oo lagu rinjiyey midabka Boqortooyada Cirka.

Haddaba, akhristaha qaaliga ah, hadda waad fahmi kartaa macnaha aan uga jeedo markaan leeyahay: Petersburg oo dhan waan aqaan.

Hore ayaan u sheegay inaan saddex maalmood oo dhammaystiran dareemayay walaac, ka hor intaanan garan sababta ay naftaydu u xasilloonaan la'dahay. Waddadana waxaan ku dareemayay raaxo-darro—wadaddan waa baxay, wadada kalena waan aaday—gurigana sidaas oo kale naftaydu sidii caadiga ahayd ma ahayn.

Laba fiid oo isku xigta ayaan maskaxdayda ku wareerinayay inaan ogaado waxa ka khaldan, sababta aan ugu dareemayay xasillooni la'aan. Anigoo wareersan ayaan si taxaddar leh u eegay darbiyadaydii cagaarnaa ee wasakhda lahaa, saqafkaygana ay qariyeen xuub-caaro, kaas oo Matrona si aad ah ugu dadaashay inuu sii weynaado.

Waxaan eegay dhammaan alaabtayda, kursi kasta waan baaray, anigoo isweydiinaya bal in dhibku halkaas ka jiro—waayo, haddii xitaa hal kursi aanu ku taagnayn meeshii uu shalay ku taagnaa, aniga dhan caadi ma ahi

Daaqadda ayaan eegay, laakiin dhammaan waxay ahayd wax aan waxba ka tarayn... waxba kama aanan roonaan!

Xataa waxaan ka fikiray inaan Matrona u yeedho. Waxaana bilaabay inaan si aabbenimo uga waaniyo xuubka caarada iyo nadaafad-darrada guud; laakiin iyadu iyadoo yaabban ayay si aamusnaan ah ii eegtay, dabadeed way iska tagtay iyadoo aan eray keliya odhan. Sidaas darteed, xuub-caaradu ilaa maantadan si raaxo leh ayuu meeshiisii ugu laalaadsan yahay.

Ugu dambayntii, saaka oo keliya ayaan ogaaday waxa qaldanaa. Ah! Maxaa yeelay, way iga sii dhuumanayaan oo waxay u cararayaan guryahooda xagaaga! ka raalli noqo hadalka fudud, laakiin maanta niyad uma hayo hadallo qurux badan... waayo, qof kasta oo Petersburg joogay wuu baxay ama wuxuu isu diyaarinayay inuu fasax u baxo; nin kasta oo muuqaal sharaf leh. Marka uu taksi fuulo, indhahayga wuxuu isla markiiba isu beddelay nin qoys leh oo mudan, kaas oo marka uu waajibaadkiisa maalinlaha ah guto u socda xagga qoyskiisa, oo ku sugan guriga xagaaga.

Dhammaan dadka jidka marayayna hadda waxay lahaayeen muuqaal gaar ah, oo qof kasta oo aan la kulmo wuxuu u muuqda inuu leeyahay: "Mudane, halkan waxaan joognaa oo keliya muddo yar, laba saacadood oo kalena waxaan u baxeynaa guriga xagaaga."

Haddii daaqad la furo, ka dib markii faro jilicsan oo cad ay muraayadda garaacaan, oo madaxa gabadh qurux badan uu daaqadda kasoo baxo iyadoo u yeeraysa nin waddada ubaxyo ku iibinaya—isla markiiba waxaan malayn jiray in ubaxyadaas aan loo iibsanayn oo keliya in lagu raaxeysto ubaxyada iyo guga iyadoo lagu dhex jiro guryaha magaalada oo ciriiri ah, balse in ay si dhakhso ah ugu guurayaan miyiga oo ay ubaxyadaasna la tegi doonaan.

Waxaa intaas dheer. Waxaan horumar intaas le'eg ka sameeyey baadhitaankaygii gaarka ahaa ee cusbaa, ilaa aan si sax ah u garan karayay muuqaalka qof kasta guriga xagaaga ee uu deggan yahay.

Dadka deggan jasiiradaha Kamenny iyo Aptekarsky, ama kuwa ku nool jidka Peterhof. Waxaa lagu yaqaanaa xarragada taxaddarka leh ee hab-dhaqankooda, dharkooda xagaaga ee moodada ah, iyo gaadiidka quruxda badan ee ay magaalada ku yimaadaan. Kuwa u socda Pargolovo iyo meelaha ka sii fog waxa marka ugu horreysa ku cajab gelinaya muuqaalkooda deggan ee sharafta leh; halka qofka u socda jasiiradda Krestovsky lagu yaqaano wejigiisa farxadda ku dheehan.

Haddii ay dhacdo inaan jidka kula kulmo saf dheer oo gaari-wadeennadu si caajis ah u socdaan, iyagoo xargaha fardaha gacmaha ku haya, dhinacyadoodana ay yaallaan gaadiid ay dusha kaga raranyihiin alaabta guryaha—miisas, kuraas, kuraasta jilicsan, soofayaal iyo agab kasta oo guri; marar badanna gabadh shaqaale oo gabowday oo tabar daran ayaa dusha uga fadhida dhammaan alaabtaas, iyadoo hantida sayidkeeda u ilaalinaysa sidii wax indhaheeda ka qaalisan—ama haddii aan arko doonyo saaid loogu raray alaab guri oo si dhib yar ugu gurguuranaya Neva ama Fontanka, kuna sii jeeda Wabiga Madow ama Jasiiradaha, gaadiidka iyo doonyahaasi indhahayga waxay ku labanlaabmi jireen toban jeer, xitaa boqol jeer.

Waxaan malayn jiray in wax walba dhaqaaqayaan oo guurayaan, in wax walba safaf dhaadheer ugu socdaan guryaha xagaaga. Waxay ila muuqatay in Petersburg ay ku dhowdahay inay noqoto meel cidlo ah, ilaa aan ugu dambayntii ka xishooday, qalbigayguna uu dhaawacmay oo murugooday, sababtoo ah anigu meel aan fasax u aado ma lahayn, mana jirin sabab aan uga baxo magaalada.

Waxaan diyaar u ahaa inaan gaari kasta raaco, inaan raaco qof kasta oo sharaf leh oo taksi fuula; laakiin qofna—qofna haba

yaraatee—ima casuumin. Waxay iila muuqatay inay i illoobeen, sidii inaan runtii iyaga shisheeye ka ahaa!

Waxaan qaadi jiray socod dheer, anigoo sidii caadadayda ahayd riyooyinkayga ku dhex lumi jiray ilaa aan gebi ahaanba illoobo meesha aan joogo, markaas ayaan si kedis ah isku arki jiray anigoo jooga albaabbada magaalada looga baxo. Isla markiiba qalbigaygu wuu fududaaday; waxaan ka gudbay barxaddii magaalada. Waxaanan dhex maray beerihii la tacbay iyo doogii, anigoo aan dareemayn daal, balse dareemaya sidii in culays naftayda saarnaa uu iga dhacayo.

Dhammaan dadkii jidka marayay waxay i siinayeen dareen saaxiibtinimo leh, ilaa ay ku dhowaadeen inay i salaamaan; dhammaantood waxay u muuqdeen kuwo wax ku faraxsan. Mid kastaaba sigaar ayuu cabbayay. Aniguna waxaan dareemayay farxad aanan weligay hore u dareemin. Waxay ila ahayd sidii inaan si kedis ah ugu dhex dhacay Talyaaniga—sidaas ayay dabeecaddu ii saamaysay anigoo ah nin magaalada ku xanuunsaday, oo ku dhowaad ku neef-qabatinaya gudaha darbiyada magaalada.

Waxaa jira wax aan la cabbiri karin oo qalbiga taabanaya oo ku jira dabeecadda ku hareeraysan Petersburg marka gu'gu soo dhowaado, oo ay dabeecaddu soo bandhigto dhammaan awooddeeda, dhammaan xoogga uu Eebbe ku mannaystay; marka ay caleemo soo saarto, is qurxiso, oo ubaxyo isku bilbisho...

Si uun, kama maarmi karo inaan xusuusto gabadh tabar daran oo tiibisho qabta, oo mararka qaar qofku u diirnaxo, mararka qaarna jacayl iyo damqasho u muujiyo, mararka qaarkoodna aan xitaa dareen u hayn; haddana si kedis ah, hal daqiiqad gudaheed, iyada oo aan la garanayn sida ay ku dhacday, waxay isu beddeshaa gabar aad u qurux badan oo soo jiidasho leh.

Markaas adigoo la ashqaraaray sidii qof la sixray, qofku kama fursanayso inuu isweydiiyo: Awooddee ayaa indhahaas murugada iyo fikirka badan ka dhigtay kuwo dab la holcaya? Maxaa dhiigga u

yeelay dhabannadaas aad dhiinka moodid? Maxaa naxariista iyo jaceylka ka buuxshay wajigaas dheeha jilicsan? Maxaa laabteeda kiciyey? Maxaa sidaas kediska ah wejiga gabadhaas miskiinta ah ugu soo celiyey xoog, nolol iyo qurux, ilaa ay dhoolla-caddaynteedu iftiimayso, qosolkeeduna noqdo mid dhalaalaya oo farxad ka buuxdo?

Hareeraha ayaad fiirinaysaa, qof ayaad raadinaysaa. Waxaadna isku daydaa inaad garato waxa dhacay... Laakiin daqiiqadahaas yar si fudud ayay kugu dhaafayaan, maalinta xigtana waxaa laga yaabaa inaad mar kale la kulanto isla wejigii murugada iyo walbahaarka lahaa, isla wejigii gabaxsanaa, isla dhaqdhaqaaqyadii degganaa ee xishoodka iyo cabsida lahaa, iyo xitaa astaamo qoomammo leh, raadad murugo dilaa ah iyo shallaynta mashquulkii gaabnaa ee daqiiqaddaas...

Waxaadna ka murugootaa in quruxdii daqiiqadda ahayd ay si degdeg ah u baaba'day oo aanay mar dambe soo noqon doonin; waxaad ka murugootaa inay kuugu iftiintay si khiyaano leh oo aan faa'iido lahayn. Waxaadna ka murugootaa inaadan xitaa helin waqti aad ku jeclaato...

Haddana, habeenkaygu wuxuu ka wanaagsanaa maalintayda! Sidaas ayay wax u dhaceen.

Waxaan magaalada ku soo noqday goor aad u dambeeysay, saacaddu markay tobanka ku dhowdahay ayaan u sii socday hoygayga. Jidkaygu wuxuu marayay jiinka kanaalka, meel saacaddaas aanad naf ku arki karin. Runtii. Waxaan degganahay meel magaalada ka mid ah oo aad u durugsan.

Anigoo jidka maraya ayaan heesaya, waayo marka aan faraxsanahay mar walba waxaan si hoose ugu luuqeeyaa laxanka, sida qof kasta oo faraxsan oo aan lahayn saaxiib ama qof ay isyaqaannaan oo uu farxaddiisa la wadaago.

Si kedis ah ayay ii qabsatay dhacdo aanan filayn. Jiinka kanaalka waxaa ku tiirsanayd haweeney, xusuladeeddana waxay saartay birta,

iyadoo sida muuqata si aad ah ugu fiirsanaysa biyaha dhoobada leh ee kanaalka.

Waxay xidhnayd koofiyad jaalle ah oo aad u qurux badan iyo maro-madow oo xarrago leh.

"Waa gabar, waana hubaa inay timo madow leedahay," ayaan is iri.

Uma muuqan inay maqashay tallaabooyinkayga, xitaa ma ay dhaqaaqin markii aan agteeda maray, anigoo neefta ceshanaya, qalbigayguna si xoog leh u garaacayo.

"Waa yaab," ayaan is iri; "waa inay arrin aad u weyn ku mashquulsan tahay," dabadeed si kedis ah ayaan u istaagay sidii qof dhagax noqday. Waxaan si hoos ah u maqlay oohin. Haa! Ma aanan qaldamin; gabadhu way ooyaysay, daqiiqad ka dibna waxaan maqlay oohin kale. Ilaahayow! Qalbigaygu wuu degay. Inkastoo aan dumarka hortooda aad u xishood badnaa, haddana tani waxay ahayd xaalad aan caadi ahayn!...

Waan soo jeestay, tallaabona xaggeeda ayaan u qaaday. Waxaana hubaal ah oo afkayga ka soo bixi lahaa erayga "Marwo!" haddii aanan ogayn in dhawaaqaas kun jeer lagu xusay sheekooyinka bulsheed ee Ruushka. Fikirkaas keliya ayaa iga joojiyey.

Laakiin intii aan eray raadinayay, gabadhii way soo baraarugtay, hareeraheeda ayay eegtay, way naxday, indhaheedana hoos ayay u dhigtay, dabadeed way iga gudubtay iyadoo jiinka kanaalka sii raacaysa. Isla markiiba waan daba galay; laakiin iyadu markay taas garatay, jiinkii ayay ka leexatay, waddadii ayay ka gudubtay, waxayna martay laamiga. Aniguna kuma dhicin inaan waddada uga daba gudbo.

Qalbigaygu wuxuu u boodboodayay sidii shinbir la soo dabray. Si kedis ah ayay fursad iigu timid oo i caawisay. Isla dhinaca laamiga, meel aan gabadha ka fogayn. Waxaa si kedis ah uga soo muuqday nin wayn oo dharkiisu ahaa kuwa fiidkii la xirto, inkastoo

socodkiisu aanu haba yaraatee xarago lahayn; wuu lulmayay, isagoo si taxaddar leh gidaarka ugu tiirsan.

Gabadhii waxay u duushay sidii fallaar, iyadoo ku socota degdegga xishoodka leh ee lagu arko gabdhaha aan doonayn in qof habeenkii iskii ugu soo bandhigo inuu guriga geeyo. Shaki kuma jiro in ninkaas lulmaya uusan daba geli lahayn, haddii nasiibkayga wanaagsani uusan isaga ku dhiirrigelin.

Si kedis ah, isagoo aan cidna hal kalmad odhan, ayuu ninkii bilaabay inuu gabadhii daba ordo. Iyadu xawaaraha dabaysha ayay ku socotay, laakiin ninkii lulmayay wuu soo gaadhay.

Gabadhii qaylo ay oodda jabsatay, aniguna nasiibkayga ayaan uga mahadcelinayaa usha guntimaha leh ee aadka u wanaagsan, taas oo markaas gacantayda midig ku jirtay. Ilbidhiqsi gudihii waxaan joogay dhinaca kale ee waddada; ilbidhiqsi gudihiina ninkii dhibka waday wuu fahmay xaaladda. Wuxuuna gartay doodda aan laga adkaan karin. Isagoon kalmad odhan ayuu dib u laabtay, oo keliya markii aan meel aad uga fogaannay ayuu ficilkayga kaga jawaabay hadallo xooggan. Laakiin erayadiisu si dhib yar ayay noo soo gaadheen.

"Gacantaada i dhiib," ayaan gabadhii ku idhi. "Isaguna kuma dhiirran doono inuu mar dambe na dhibo."

Iyadoo aan eray odhan ayay gacantayda qabatay, welina way la gariiraysay xamaasad iyo cabsi. Sidee baan ugu mahadnaqay daqiiqaddaas! Daymo ayaan ku xaday; aad bay u qurux badnayd, illin ayaa weli ka dhalaalayay baalasha indhaheeda madow—ma garanayo inay ahayd illin ka dhalatay argaggixii ay hadda uun soo martay iyo inay ahayd murugadeedii hore. Laakiin bushimaheeda waxaa durba ka muuqatay dhoolla-caddayn yar.

Iyaduna si hoose ayay ii fiirisay, dabadeedna indhaheeda ayay hoos u dhigtay.

"Waa kan, waad arkaysaa; maxaad ii eryaysay? Haddii aan halkan joogi lahaa, waxba ma dhaceen..."

"Laakiin kuma aqoon; waxaan moodayay inaad adiguna..."

"Haddaba, hadda ma i taqaannaa?"

"Wax yar! Tusaale ahaan, maxaad u gariiraysaa?"

"Ah, markii ugu horraysayba si sax ah ayaad u garatay!" ayaan ugu jawaabay, anigoo ku faraxsan in gabadhu garasho leedahay; garashaduna weligeed kama madhna quruxda.

"Haa, hal eegis oo keliya ayaad ku garatay ninka aad la macaamilayso. Sidaas weeye; dumarka hortooda waan xishoodaa, waan khalkhalaa, taasna ma inkirayo, sida aad adigu daqiiqad ka hor u argaggaxday markii ninkaas ku cabsi geliyey. Aniguna hadda xoogaa waan baqayaa. Waxay ila tahay riyo oo kale. Xataa riyadayda kuma aanan malayn inaan mar uun haweeney la hadli doono."

"Maxaad tidhi? Runta miyaa?"

"Haa; haddii gacantaydu gariirayso. Waxaa sabab u ah inaanan weligay gacantayda ku qaban gacan yar oo qurux badan sida taada oo kale. Dumarka aad iskuguma fiicnin; taas waxaan ula jeedaa, weligayba uma aanan baran inaan la macaamilo. Waad arkaysaa, kaligay ayaan ahay... Xataa ma aqaan si aan ula hadlo. Bal eeg, hadda ma garanayo inaan hadal nacasnimo ah ku iri iyo in kale! Si daacad ah iigu sheeg; hore ayaan kuugu ballanqaadayaa inaanan si fudud u xanaaqin..."

"Maya, maya, haba yaraatee si xun uma aadan hadal; taas beddelkeeda. Haddii aad ku adkaysato inaan si daacad ah u hadlo. Waxaan kuu sheegayaa in dumarku ay ka helaan xishoodkaas; haddii aad rabto inaan wax ka sii sheego, aniguna waan ka helaa, mana kaa tegi doono ilaa aan guriga ka gaadho."

"Adiga ayaa iga dhigi doona," ayaan idhi anigoo farxad darteed neeftu igu dheggan tahay, "inaan xishoodka ka gudbo, dabadeedna dhammaan fursadaas aan lumin..."

"Fursad? Fursad noocee ah? Maxaad ula jeeddaa? Taasi ma fiicna."

“Iga raalli noqo, waan ka xumahay; hadal aan ula jeedin ayuu afkaygu iga soo xaday. Laakiin sidee baad qof xilligan oo kale ku sugi kartaa inuusan jeclaan inuu...”

“In la jeclaado, miyaa?”

“Haa, dabcan; laakiin Ilaahay dartii, iigu naxariiso. Bal ka fikir qofka aan ahay! waxaan ahay lix iyo labaatan jir, weligayna qof dumar ah lama sheekeysan. Sideen ula hadli karaa si fiican, oo xeeladaysan hadalkayguna u noqdo mid toos ah? Wax walba marka aan si furan kuugu sheego, way kuu fududaan doonaan inaad fahanto... Ma aqaan si aan u aamuso marka qalbigaygu hadlayo. Hagaag, iska daa... I rumayso, hal haweeney oo keliya ma jirto aan weligay, weligay! Wax xidhiidh ahna ma lihi! Maalin kasta waxa aan sameeyaa oo keliya inaan ku riyoodo in ugu dambayn aan qof la kulmi doono. Alla, haddii aad ogaan lahayd inta jeer ee aan sidaas oo kale qof u jeclaaday...”

“Sidee u riyootay? ayaad jeclaatay?”

“Maya, qofna ma jeclaan? Waxaan leeyahay qof aan maskaxdayda ku sawirtay, qof aan riyooyinkayga ku arko. Riyooyinkayga waxaan si joogto ah ugu samaystaa sheekooyin jacayl. ah, adigu ima taqaanid! Waa run, dabcan. Waxaan la kulmay laba ama saddex haween ah, laakiin haween noocee ah bay ahaayeen? Dhammaantood waxay ahaayeen haween guryo leh, kuwaas... Laakiin waad igu qosli doontaa haddii aan kuu sheego in jeer aan ka fikiray inaan hadal la bilaabo—si fudud oo keliya aan ula hadlo—haweeney sharaf leh oo waddada maraysa, iyadoo kaligeed ah, dabcan; inaan ula hadlo si xishood leh, ixtiraam leh, oo qalbiga ka timid; inaan u sheego inaan kelinimada ku baaba'ayo, oo aan ka baryo inaanay i fogayn; inaan u sheego inaanan haysan fursad aan qof dumar ah ku barto; inaan ku qanciyo inay tahay waajib dhab ah oo haweeneydu leedahay inaanay iska fogayn nin nasiib daran oo sidaas u xishood badan oo baryaya. Waxa keliya ee aan ka doonayo, dhab ahaantii, waa inay igula hadasho laba ama saddex eray oo

walaaltinimo leh oo naxariis ka buuxdo; inaanay marka ugu horreysa iska kay fogayn; inay ii aaminto oo ay dhegaysato waxa aan leeyahay; haddii ay rabto ha igu qososho, ha i dhiirrigeliso, laba eray oo keliya ha igula hadasho, laba eray oo keliya. Xataa haddii aynaan mar dambe is arag... Laakiin waad qosleysaa; si kastaba ha ahaatee, taas ayaaba ah sababta aan kuugu sheegay..."

"Ha xanaaqin; waxaan kaliya ku qoslayaa inaad adigu naftaada cadow ku tahay. Haddii aad isku dayi lahayd. Waxaa laga yaabaa inaad ku guulaysan lahayd. Xataa haddii ay waddada ahayd; inta ay wax fudud yihiin, ayay ka sii wanaagsan yihiin... Haweeney naxariis badan, haddii aanay nacas ahayn ama —aanay xilligaas wax ka cadhoonayn, marnaba nafteeda kuma qasbi lahayn inay ku iska ka indho tirto iyadoo aan ku siin labadaas eray ee aad sidaas u xishoodka badan uga baryayso... Laakiin waxaan ku leeyahay? Dabcan, waxay kuu malayn lahayd inaad waalan tahay. Anigu naftayda ayaan tusaale ka hadlaya; wax badan ayaan ka ogahay nolosha dadka kale."

"Alla, mahadsanid!" ayaan ku qayliyay. "Ma garanaysid waxa aad hadda ii qabatay!"

"Waan ku faraxsanahay! Waan ku faraxsanahay! Laakiin ii sheeg, sidee baad ku ogaatay inaan ahay nooca haweeneyda aad u malaynayso inay mudan tahay... si fiican, mudan in la daryeelo oo saaxiibtinimo lala yeesho... dhab ahaantii, aanan ahayn haweeney guri leh sidaad tidhi? Maxaa kugu kallifay inaad ii soo dhowaato?"

"waxaa igu kallifay?... Laakiin adigu kaligaa ayaad ahayd; ninkaas aad buu u xadgudbayay; habeen bay ahayd. Waa inaad qirataa inay ahayd waajib inaan kuu soo dhowaado..."

"Maya, maya; taas uma jeedo. Waxaan ula jeedaa markii hore, dhinaca kale ee kanaalka—waad ogayd inaad doonaysay inaad ii soo dhowaato."

"Dhinaca kale? Runtii ma garanayo si aan uga jawaabo; waan ka baqayaa inaan... Ma ogtahay, maanta aad baan u faraxsanaa? Anigoo

heesaya ayaan socday; bannaanka magaalada ayaan aaday; weligay daqiiqado sidan u farxad badan ma aanan helin. Adiga... waxaa laga yaabaa inay male-awaalkayga ahayd... Iga raalli noqo inaan arrintaas soo hadal qaado; waxaan mooday inaad ooyaysay, aniguna... ma aanan u adkaysan karin inaan maqlo... qalbigayga ayay xanuun gelisay... Alla, Ilaahayow! Sow xaq uma lihi inaan kaa welwelo? ma dhib aya ku jira inaan kuu dareemo naxariis walaaltinimo?... Iga raalli noqo. Waxaan idhi naxariis... Hagaag, si kooban, sow kama xumaan lahayn haddii dareenkii aan si aan ula kac ahayn ugu kacay oo aan xaggaaga kuugu soo dhowaaday uu ahaa mid waxyeello leh?..."

"Joog, intaas baa igu filan, arrintaas ha ka hadlin," ayay gabadhii tidhi iyadoo indhaha hoos u dhigaysa oo gacantayda cadaadinaysa. "Anigaa khaladka lahaa inaan ka hadlo; laakiin waan ku faraxsanahay inaanan kaa qaldamin... Laakiin hadda gurigaygii ayaan joogaa; waa inaan jidkan ka leexdaa, meel laba tallaabo oo keliya u jirta... Nabadgelyo, mahadsanid!..."

"Dabcan... dabcan ma ula jeeddaa... inaanan mar dambe is arki doonin?... Sow tani ma aha inay dhammaad noqoto?"

"Waad arkaysaa," ayay gabadhii tidhi iyadoo qosleysa, "markii hore waxaad doonaysay laba eray oo keliya, haddana... Si kastaba ha ahaatee, waxba ma odhanayo... laga yaabee inaan is aragno..."

"Berri ayaan halkan imanayaa," ayaan idhi. "Ah, i cafi, durba dalab ayaan bilaabayaa..."

"Haa, dulqaad badan ma lihid... ku dhowaad waad igu adkaysanaysaa."

"Dhagayso, dhagayso!" ayaan hadalkii kaga dhex galay. "Iga raalli noqo haddii aan wax kale kuu sheego... Waxaan kuu sheegayaa, kama ahaan karo inaan berrito halkan imaado; waxaan ahay qof riyo ku nool, nolosha dhabta ahna aad bay iigu yar tahay, sidaas darteed daqiiqadaha noocan ah ee hadda oo kale ah waxaan u arkaa inay aad naadir tahay, mana awoodo inaanan mar kale

riyooyinkayga ku noolaado daqiiqado sidan oo kale ah. Habeenka oo dhan ayaan adiga kugu riyoon doonaa, toddobaad dhan, sannad dhan. Hubaal berri halkan ayaan imanayaa, meeshan aynu joogno, isla saacaddan. Waxaana ku farxi doonaa anigoo xusuusanaya maanta. Meeshan durba waxay ii noqotay meel qaali ah. Petersburg gudaheeda waxaan hore ugu lahaa laba ama saddex meelood oo sidan oo kale ah. Mar baan xusuuso darteed ilmada ku qubay... Sida adiga oo kale... Yaa og, laga yaabee inaad toban daqiiqo ka hor adiguna xusuus darteed u ooyaysay... Laakiin i cafi, haddana waan is hilmaamay; laga yaabee in mar hore halkan kugu soo martay daqiiqado farxad gaar ah leh..."

"Waa hagaag," ayay gabadhii tidhi, "laga yaabaa inaan aniguna berri halkan imaado, toban saac. Waxaan arkayaa inaa nan kaa joojin karin... Runtu waxay tahay inaan halkan imaado; ha u malayn inaan ballan kula galayo. Hore ayaan kuugu sheegay inaan anigu arrin ii gaar ah darted halkan u imanayo. Laakiin... hagaag, si toos ah ayaan kuugu sheegayaa, waxba igama gelin haddii aad timaaddo. Marka hore. Waxaa laga yaabaa inay dhacdo wax aan wanaagsanayn, sidii maanta oo kale, laakiin iska daa taas... Si kooban. Waxaan jeclaan lahaa inaan ku arko... oo aan laba eray ku dhaho. Laakiin ogow, hadda yaanay kula noqon inaan ahay gabar aan arrimaha noocan ah si fudud ballan ugu qaada! Ha u malayn inaan si sahlan ballamo u sameeyo... Ma samayn lahayn haddii aanay ahayn in... Laakiin taas sir baan ka dhiganayaa! Keliya hal heshiis..."

"Heshiis! ii sheeg, wax walba hadda ii sheeg; wax kasta waan kugu raacsanahay, wax kastana diyaar baan u ahay," ayaan farxad darteed ku qayliyay. "Naftayda ayaan dammaanad ka qaadayaa; waan addeeci doonaa, ixtiraam ayaan yeelan doonaa... waad i taqaan..."

"Sababtu waa inaan ku aqaan, waana taas sababta aan kaaga codsanayo inaad berri timaaddo," ayay gabadhii tidhi iyadoo qosleysa. "Si fiican ayaan kuu garanayaa. Laakiin ogow. Waxaad ku

imanaysaa hal shardi awgiis, marka hore—keliya wanaag samee, samee waxa aan kaa codsado; waad arkaysaa, si toos ah ayaan u hadlayaaye—inaadan i jeclaan... Taasi suurtagal ma aha, waan kuu xaqiijinayaa. Saaxiibtinimo diyaar u ahay; gacantaydana waa tan... Laakiin waa inaanad i jeclaan, waa iga codsi!"

"Waxaan ku dhaaranayaa!" ayaan ku qayliyay anigoo gacanteeda qabsanaya...

"Shhh, ha dhaaran; waan ogahay inaad sida baaruudda oo kale si fudud u holci karto. Ha ii qaadan si xun inaan sidaas kuu leeyahay. Haddii aad ogaan lahayd... Aniguba ma haysto qof aan xataa hal eray la wadaago, qof aan talo waydiisto. Dabcan, waddada lagama raadsado qof talo-bixiye ah; laakiin adigu waad ka reeban tahay. Waxaan kuu aqaan sidii inaan labaatan sannadood saaxiibbo ahayn... I khiyaami maysid, sow ma aha?"

"Waad arki doontaa... waxa keliya ee aanan garanayn waa sida aan afar iyo labaatanka saacadood ee soo socda u sii noolaan doono."

"Si fiican u seexo. Habeen wanaagsan, oo xusuuso inaan durba ku aaminay. Laakiin si qurux badan ayaad u tidhi,'qofna laguma eedayn karo dareen kasta oo qalbigiisa ku dhaca. Xataa haddii uu yahay naxariis walaaltinimo!' Ma ogtahay, hadalkaas aad buu ii taabtay, isla markiiba waxaan is idhi waxaa laga yaabaa inaan adiga sirteyda kula wadaago?"

"Ilaahay dartii, iigu sheeg; laakiin maxay ku saabsan tahay? Waa maxay?"

"Berri sug. Inta ka horreysa, arrintaas sir ha inoo ahaato. Adiga ayay kuu fiican tahay; waxay ku siinaysaa wax yar oo xamaasad jacayl ah. Waxaa laga yaabaa inaan berri kuu sheego. Waxaana laga yaabaa inaanan kuu sheegin... Marka hore wax yar ayaan kula sii sheekaysan doonaa; si wanaagsan ayaynu isu baran doonnaa..."

"Haa, haa, berri wax walba ayaan kaaga sheekayn doonaa! Laakiin maxaa dhacay? Waxay ila tahay in mucjiso igu dhacday...

Ilaahayow, xaggee baan joogaa? Bal ii sheeg, miyaadan ku faraxsanayn inaadan xanaaqin oo aanad markiiba i eryin, sida ay haweeney kasta oo kale samayn lahayd? Laba daqiiqo gudahood ayaad iga dhigtay qof weligiis faraxsan. Haa, qof faraxsan; yaa og, laga yaabee inaad naftayda dib iigu soo celisay, oo aad shakiyadaydii xallisay!... Waxaa laga yaabaa inay mararka qaarkood igu dhacaan daqiiqado sidan oo kale ah... Laakiin taas oo dhan berri ayaan kaaga sheekayn doonaa; wax walba waad ogaan doontaa, wax walba..."

"Waa hagaag, waan oggolahay; adiga ayaa bilaabaya..."

"Waan aqbalay."

"Berri ayaan is arkaynaa!"

"Berri ayaan is arkaynaa!"

Markaas ayaan kala tagnay.

Habeenkii oo dhan waan iska meeraystay; guriga inaan aado ayaanba go'aan ka gaadhi kari waayay. Aad baan u faraxsanaa... Berrito!

HABEENKII LABAAD

“Haddaba waad badbaadday!” ayay tidhi iyadoo labadayda gacmoodba cadaadinaysa.

“waxaan ku sugayey muddo laba saacadood ah, ma malayn kartid maanta waxaan ku sugnaa. “

“ Waan ogahay waan ogahay... lakiin arrin aynu ka wada hadalno, miyaad ogsoon tahay sababta aan halkan u yimid?

Run ahaantii uma iman inaan wax macno la'aan ah ka wada hadalno sidii habeen hore aan samaynay oo kale, waad ogtahay hadda laga bilaabo waa inaan u dhaqano si caqliyeysan.

Xalay wax badan ayaan ka fikiray”

“si caqliyeysan aa? Waan kugu raacsanahay wax walba oo aad tiraahdo, lakiin hadii aan si daacadnimo ku dheehan tahay kuugu sheego: ma jirto maalin aan maanta ka firfircoonahay.”

“runta miyaa? Marka koowaad waxan ka codsanaya inad gacanta isii deys, marka labaadna waxaan rabay inaan kuu sheego inaan maanta kaa fikirayey.”

Ka dibna maxaad fikirkaaga ku soo gaba gabeysay?”

“gebo gebo aa? Waxaan goaansaday inaan sheekada dib u so bilawno. Waxaan xaqiiqsaday inaan noloshaada wax ba ka aqoon, shalayna aan u dhaqmay sida gabadh yar oo kale. Waxaanan nafteyda iyo qalbigeygan jilicsan ku eedeynayey wax walba oo dhacay. Dhinaca kale waxaan nafteyda ku mahdinayey sida aan u so afjaraynay marwalba oo aan arrinteena falanqeyno.

Hadda si aan u saxo khaladkaas; waxaan goaansaday inaan ogaado wax walba oo adi kugu saabsan.

Maadaama aysan jirin qaab kale oo aan kugu ogaan karo qofka aad tahay, waa inaad adi i sheegta xog walba,

Haddaba qof nooce ah ayaad tahay? Si dhakhso ah qisadaada iigu sheeg!”

“Qisadayda aa!” ayaan dhahay aniga oo xiisaynaya “marka koowaadba maxaad ugu fikirtay inaan ani qiso leeyahay. Run ahaantii anigu wax qiso ah ma lihi “

Kadibna qosol ayey ku dhufatey

“Lakiin sideed u nooshahay adigoon lahayn wax qiso ah oo aad ka sheekeyso? “

“ilaa inta aan jiro waxaan noolahay anigo oo aan lahayn qiso aan ka sheekeeyo. Waxaan u noolaa sidii la yiraahdo anigoo naftayda kelinimo ku koobay; taas macnaheedu waa, gebi ahaanba kaligay—kaligay, cidlo aan cidna wehel u ahayn. Ma garanaysaa waxa ay tahay inaad kaligaa noqoto?”

“maxaad ka wada inad cidlo tahay? Miyaanad weliga saaxiib samaysan?”

“maya saaxiib waan samaystay laakiin hadeer cidlo ayan ahay”

“ka dibna? Ma waxad u jeed inaad weligaa aanad qof si dhab ah ula sheekaysan? “

“weligay si dhab ah ula ma hadlin “

“laakiin yaad tahay? ii sheeg, maya ha ii sheegin anigu aan qiyaaso, waxan kugula shardami karaa inaad leedahay ayeeydey oo kale. Ayeeydey way indho la'dahay, ii mana ogolaato inaan meel tago___ xata waan ilaaway sida loo hadlo. Sannado ka hor mar aan ayeey fawdeeyay, waxay ogaatay inaysan inta wixi ka dambeya i maamuli karin. Inta ay ii yeedhay oo ay agteeda iso fariisisay ayey maro yar ku xidhay maryaha ay xidhan tahay iyo gacanteyda. Mararka qaar wakhti badan ayan sidaas u garab fadhiyaa. Iyadu maryaha ayay tosha iyada oo indha la', ana waan caawiya ama buugta ayaan u akhriyaa. Sidaas ayaan muddo labo sano ah ugu xidhnaa maradeeda, waa arrin cajiib ah saw maha?”

“Ah waa arrin laga yaqyaqsado! Lakiin anigu ayeey ma lihi “

“ma lihid miyaa? Lakiin sideed guriga u dhex fadhidaa wakhtigaas oo idil?”

“i dhageyso, miyaan kuu sheegaa qofka aan ahay?

“Haa ii sheeg”

“waxaan ahay riyo-kunoole”

“ma waxa tahay qof riyo kunool? Lakiin qof riyo ku nool oo nooce ah ayad tahay” ayey dhahdey iyada qosol ay muddo isku xajineysay ku dhufatay “ alla qof xaraabaad badan ayaa tahay, ina mari kursigaas aan ku fadhisanee, ruuxna xagaas maso maraye, maxa yeelay xagaas ayaad iigu sheekayn karta iyada oo uu san qofna na maqleyn. Ii sheeg, waxan rabaa inaan sheekadaada maqlo. Iguma qancin kartid inaysan jirin sheeko aad iiga sheekeyso. Waxaad tahay qof dahsoon, ugu horeyn ii sheeg waa maxay riyo-ku noole?”

“Riyo ku noole waa qof laga maadsado oo aan dadka caadiga la mid aheyn “ ayan dhahay aniga oo uu qosolkeedi i saameeyey, “ waa qof jilaa ah, i maqal adi miyad garaneysa riyo ku noole waxa uu yahay.”

“Riyo ku noole? Sidee ayan u aqoonsan kari waayay qofka uu riyo ku noole yahay? Waxan u maleeyaaba inan ani ahay. Mararka qaar ma malayn kartid waxa maskaxdayda ka dhex guuxaya, sida aan ayeeydey u garab fadhiyo waxan dhex dabashaa riyooyinkayga, mararka qaarna marka aan socdo heer waxan gaadha aan guursado boqor jayniis ah. Sabab? Sababto ah aad ayey u fiican tahay in la riyoodo” intaas ka dib waxay ku dartay iyada oo aan dhoola cadeyneyn “ run ahanti saas maaha marka ay jiraan wax kale oo aad ka fikirto”

“waa si fiican maadaama aad mar hore riyo ku guursatey amiir jayniis ah,

Xaqiiqdii si fiican ayad ii fahmi doonta. I maqal... lakin ilaa hadeer magacaga kuma weydiin.”

“Magacaygu waa Nastenka.”

“Nastenka. Ma intaas uun baa?”

“Intaas uun baa! Adigu waxba kuguma filna. Waxaad u muuqataa qof aan abid qanceyn!”

"Maya maya, waan ku qancay! Runtii aad ayaan ugu farxay! Adigu waxad tahay gabar fiican oo si dhaqso ah Nastenka iigu noqotay!"

"Hadda waad fiican tahay! Laakiin hadda sii wad, wax iga sheeg."

"Haye, Nastenka, bal dhagayso sheekadan qosolka badan ee igu dhacday markaas."

Waxaan dhinac fadhiistay Nastenka. Waxaan iska dhigay qof aad iyo aad caqiibo ah oo culus, ka dibna waxaan bilaabay inaan u hadlo sidii qof qoraal uu horay u diyaarsaday ka akhrinaya:---

"Nastenka. Waxaa Petersburg ka jira meelo yaab leh oo qarsoon, inkastoo laga yaabo inaadan ogayn. Waxay u muuqataa in qorraxda caadiga ah ee dadka Petersburg oo dhan u iftiimaysa aysan meelahaas si dhab ah u gaarin. Waxaad mooddaa in meelahaas ay leeyihiin qorrax kale oo gaar ah, qorrax cusub oo iyaga loogu talagalay, taas oo wax kasta ku iftiimisa si ka duwan. Meelahaas, Nastenkadayda qaaliga ah. Waxaa ka jirta nolol gebi ahaanba ka duwan tan nagu hareeraysan. Waxaa laga yaabaa in noloshaas oo kale ay ka jirto adduun qarsoon oo aanan garanayn, oo aan ka mid ahayn adduunkeenna caadiga ah ee xilligan aadka u culus."

"Ooff! Ilaahayow! Hordhac qurux badan! Maxaan maqlayaa?"

"Dhagayso, Nastenka. (Waxay ila tahay inaanan weligay ka daali doonin inaan magaca Nastenka kuugu yeero.) Aan kuu sheego in meelahan ay ku nool yihiin dad yaab leh—dad riyoo ku nool ah (dreamer), Dreamer-ka—haddii aad rabto qeexitaan sax ah—ma aha qof bani'aadam ah oo caadi ah, balse waa makhluuq nooc dhex dhexaad ah. inta badan wuxuu fadhista meel cidlo ah oo aan si fudud loo gaari karin, sidii qof ka dhuumanaya iftiinka maalinta. Marka uu geeskiisa galo, halkaas ayuu si tartiib ah ugu negaadaa, sida qoolleyda qolofka leh, Ama, ugu yaraan arrintaas wuxuu aad ugu egyahay xayawaankaas yaabka leh ee isku mar ah xayawaan iyo guri, kaas oo la yiraahdo diinka.

Maxaad u malaynaysaa inuu sidaas ugu jecel yahay afarta gidaar ee qolkiisa, kuwaas oo had iyo jeer lagu rinjiyeeyo cagaar wasakhaysan oo murugo leh, oo si aan loo dulqaadan karin uga urayo qiiqa tubaakada? Maxay tahay sababta marka ninkan yaabka leh mid ka mid ah dadka yar ee uu yaqaan uu soo booqdo, ugu dambayntiina wuxuu iska fogeeyaa dhammaan saaxiibbadiis? Maxay tahay sababta uu qofkan yaabka ahi ugu soo dhaweeyo isagoo aad u xishoonaya, wajigiisuna is beddelayo, jahwareerna ka muuqdo? Waxaad mooddaa inuu hadda uun dembi weyn ku galay afartiisa gidaar dhexdooda; Waxaad mooddaa inuu qofkani qolkiisa ku dhex samaynayay lacag been-abuur ah, ama waxaad mooddaa inuu gabayo qorayay oo uu joornaal u dirayo, isagoo wata warqad aan magaciisa ku qornayn, kuna sheegaya in gabayadaasi yihiin kuwo uu qoray saaxiibkiis dhintay, sidaas darteedna uu isagu u arko inay tahay waajib muqaddas ah inuu dadka u soo bandhigo.

Ii sheeg, Nastenka, maxay tahay sababta ay labada saaxiib ugu adkaato inay si dabiici ah u wada sheekeystaan? Maxaysan qosol u jirin?

Maxay eray firfircoon oo kaftan ah uga soo bixi la'yahay afka martida wareersan?

Muxuu saaxiibkan, oo laga yaabo inuu yahay saaxiib cusub oo markii ugu horreysay u yimid, uu u wareeraa—maadaama ay aad u yar tahay inuu mar kale yimaado, dhab ahaantiina laga yaabo inuusan dib dambe u soo noqon?

Muxuuu saaxiibka laftiisu u noqdaa mid wareersan oo hadalku ku dhego Markuu eegayo wejiga hoos u foorara ee ninka guriga leh,

Wuxuu noqdaa qof gebi ahaanba tabar daran oo aan garanayn waxa uu sameeyo, Ka dib uu sameeeyo iskuday aad u weyn oo aan waxba ka soo bixin, si uu xaaladda u dejiyo oo sheekada u soo nooleeyo. Wuxuu isku dayayaa inuu muujiyo inuu yahay qof bulshaawi ah, oo ka hadla dumarka, jacaylka, iyo arrimo kale oo madadaalo leh.

Wuxuu sidaas oo dhan u samaynayaa si uu uga farxiyo ninka saboolka ah/aan nasiibka lahayn, kaas oo sida kalluun biyihii laga soo saaray ugu wareersan, si khalad ahna ugu yimid inuu soo booqdo.

Maxay tahay sababta ninkii, si kedis ah ugu xasuusto hawl aad muhiim u ah oo dhab ahaantii aan jirin Wuxuu si kedis ah u qabsadaa koofiyaddiisa oo si degdeg ah uga baxaa. Wuxuu isku dayayaa inuu raalli-gelin muujiyo oo uu badbaadiyo xaaladdii xumaatay—laakiin mar hore ayay wax walba qaldameen.

Muxuu saaxiibkii qosol-hoosaad u sameeyaa marka uu albaabka ka baxayo?

Wuxuu ku dhaartaa inuusan mar dambe u iman doonin ninkan yaabka leh,

Inkasta oo ninkan yaabka ahi dhab ahaantii yahay nin aad u wanaagsan, wejigiisa wuxuu la mid yahay bisad yar oo aan faraxsanayn muddo dheer ka dibna waxay nolosha iyo dabeecadda lafteeda u eegaysaa iyadoo xanaaqsan.

"I maqal," ayay Nastenka hadalka iga dhex gashay, iyadoo intii aan hadlayay oo dhan si yaab leh ii dhegaysanaysay, indhaheeda iyo afkeeda yar si weyn u kala qaadday. "Dhagayso; anigu haba yaraatee ma garanayo sababta ay arrintaasi u dhacday iyo sababta aad su'aalahan yaabka leh ii waydiinayso; waxa keliya ee aan ogahay waa in dhacdadan aad hadda sheegtay ay adiga, mid mid, dhab ahaan kuugu dhacday."

"Shaki kuma jiro," ayaan ugu jawaabay anigoo wejigayga ka dhigay mid aad u gabaxsan.

"Hagaag, maadaama aan arrintaas shaki ka jirin, sii wad, sababtoo ah aad baan u doonayaa inaan ogaado sida ay ku dhammaanayso."

Waxaad rabtaa inaad ogaato waxa geesigeenna (hero) —kaas oo ah aniga

Sababtoo ah geesiga sheekadan oo dhan wuxuu ahaa qofkayga isla aniga qudhayda.

Ma doonaysaa inaad ogaato sababta aan u argagaxay oo maalintii oo dhan u xanaaqay/uga murugooday booqashadii lama filaanka ahayd ee saaxiibkay?

Ma doonaysaa inaad ogaato sababta aan sidaas ugu naxay? Sababta aan u awoodi waayay inaan martidayda si wanaagsan u soo dhaweeyo oo ula sheekeysto? Sababta aan u wajieygu u casaaday markii albaabka qolkeyga la furay? Sababta aan ugu awoodi waayay inaan martidayda si wanaagsan u soo dhaweeyo oo ula sheekeysto? Sababta aan ugu burburay culayska martigelintaydii lafteeda?

"Haa, haa! Taasi waa waxa aan doonayo inaan ogaado" ay nastenka ku hadaaqday

"Si aad u qurux badan ayaad wax walba u sharraxaysaa, laakiin miyaadan wax yar ka fududayn karin? Waxaad u hadlaysaa sidii qof buug ka akhrinaya"

"Nastenka," ayaan ugu jawaabay cod adag oo sharaf iyo xarrago leh, anigoo si dhib yar iskugu celinaya qosolka, "Nastenkadayda qaaliga ah, waan ogahay inaan si aad u qurux badan wax u sharraxo, laakiin iga raalli noqo, ma aqaan hab kale oo aan u sheego.

Hadda, Nastenkadayda qaaliga ah. Waxaan la mid ahay ruuxdii Boqor Sulaymaan, kaas oo kun sano ku jiray khasnad, oo ay ku xidhnaayeen toddobada shaabadood; dabadeed ugu dambayn toddobadii shaabadood laga furay.

Hadda, Nastenka, markii ugu dambaysay ee aan is helnay ka dib kala-fogaansho intaas le'eg—waayo. Waxaan ku aqaanay qarniyo badan, Nastenka, sababtoo ah muddo aad u dheer ayaan raadinayay qof, taasina waxay calaamad u tahay in qofka aan raadinayay aad ahayd adiga, oo loo qaddaray inaan hadda kulanno—hadda, xilligan, kun waalka ayaa madaxayga ka furmay, waana inaan naftayda u daayaa inay ku soo qulqulaan webi erayo ah, haddii kale waan ku mergan doonaa.

Sidaas darteed waxaan kaa codsanayaa inaadan hadalkayga iga dhex gelin, Nastenka, balse si deggan oo addeecid leh ii dhagayso; haddii kale waan aamusayaa."

"Maya maya wanku dhagaysanaya sii wad "

"Waan sii wadi doonaa, saaxiibtey Nastenka. Waxaa jira hal saacad oo maalintayda ka mid ah oo aan si aad ah u jeclahay. Waa saacadda ay ku dhowaad dhammaan ganacsigii, shaqadii iyo waajibaadkii maalintu dhammaadaan, qof kastana uu gurigiisa ugu degdegayo inuu casho helo, inuu jiifsado, ama uu nasto. Inta ay jidka ku sii jiraan, qof kastaa wuxuu maskaxdiisa ku mashquulinayaa arrimo kale oo ka farxad badan—kuwa la xiriira fiidkooda, habeenkooda, iyo dhammaan waqtiga kale ee firaaqada ah ee u haray.

Saacaddaas, geesigeenna—ee ii oggolow, Nastenka, inaan sheekadayda u sheego sida inay qof kale ku socoto, sababtoo ah qofku aad buu uga xishoodaa inuu sheekadiisa isaga oo "aniga" dhahaya uga warramo—saacaddaas, geesigeenna, oo isaguna shaqo lahaa. Wuxuu dadka kale daba socday isagoo jidka ku socda.

Laakiin dareen farxad oo yaab leh ayaa wejigiisa kakan, ee xoogaa daallan oo isku laalaabmay, ka muuqday. Si aan danayn lahayn uma eegin iftiinkii fiidkii ee si tartiib ah uga sii libdhayay cirka qabow ee Petersburg. Markaan leeyahay "wuu eegayay," dhab ahaantii been ayaan sheegayay: si dhab ah uma uu eegin. Wuxuu uun arkayay iftiinkaas isaga oo aan si buuxda u dareensanayn waxa uu arkayo; sidii qof daallan ama maskaxdiisu ku mashquulsan tahay arrin kale oo isaga uga xiiso badan, ilaa heer uu san arki karin wax kasta oo hareerihiisa ka dhacaya.

Wuxuu ku faraxsanaa in ilaa maalinta xigta laga fasaxay shaqadii isaga ku cuslayd ee uu necbanaa. Wuxuuna u faraxsanaa sida arday yar oo fasalkii laga soo fasaxay, oo hadda u cararaya ciyaartiisa iyo madadaaladiisa.

U fiirso, Nastenka; isla markiiba waxaad ogaanaysaa in shucuurta farxadeed ay mar horeba raad ku yeelatay neerfahiisa itaalka daran iyo male-awaalkiisa xamaasadda qayyaxani ku dhex jirto. Waxaad arkaysaa inuu wax ka fakarayo... Ma cashadii ayaad u malaynaysaa inu ka fikirayo? Ma fiidkii? Maxay tahay waxa uu sidaas u eegayo? Ma ninkaas haybadda iyo xarragada leh ee sida farshaxannimada ah ugu foorarsanaya dadka ku dhex jirta gaadhiga ay jiidayaan fardaha boodboodaya? Maya, Nastenka; side ay ula muuqdaan waxyaabahaas yar-yari isaga hadda! Hadda wuu ku qanacsan yahay noloshiisa u gaarka ah; si kedis ah ayuu u noqday hodan, mana aha sabab-la'aan in ilayska qorrax-dhaca sii libdhayaa uu biriqdiisa sagootinta ah si dhalaal leh ugu sii daayo horkiisa, uuna ka soo maaxiyo mawjado dareen ah wadnahiisan kululaaday.

Hadda xatta ma ka warhayo waddada uu u socdo—waddadaas oo waqtiyada kale faahfaahinta ugu yar ee ku taal ay indhihiisa soo jiidan lahayd. Hadda'Ilaa hadda Male-Awaalka' (haddii aad akhrisay Zhukovsky, Nastenka-deyda qaaliga ah) waxay mar horeba gacanteedii mucjisada ahayd ku rogtay duntayda dahabiga ah, waxayna ku dul tolaysaa naqshado nolosha sixirka iyo yaabka leh —yaana og, malaha gacanteedii cajiibka ahayd waxay u duulisay ilaa samada toddobaad ee kiristalka ah, iyadoo ka fogaynaysa jidka dhagax-garaaniitka ah ee heerka sare ah ee uu cagaha ku hayay?

Isku day inaad hadda joojiso, oo weydii meesha uu hadda taagan yahay iyo waddooyinka uu marayo— waxay u badan tahay inaanu waxba ka xusuusan doonin, halka uu u socdo iyo meesha uu taagan yahay toona. Wuxuuna isagoo cadho iyo xishood la gaduudanaya dhab ahaan kuu sheegi doonaa been si uu sharaftiisa u ilaashado.

Waana sababta uu u boodo, ee uu ku dhowaado inuu belbelo, isagoo si cabsi leh ugu eegaya hareerahiisa marka ay haweenay waayeel ah oo si xushmad leh ugu joojiso jidka dhexdiisa oo ay weydiiso waddada. Isagoo caro iyo dibro xun la weji-qursoomaya

ayuu tallaabada dheereeyaa, isagoo ku dhowaad dhanbaal ka siinayn in ka badan halkii qof ee agmarayaa ay u dhoolacadaynayaan oo ay gadaal u soo eegayaan, iyo in gabadh yari, oo cabsi darteed jidka kaga leexanaysa, ay kor u xandhattay, iyadoo indhaha oo waaweyn ku eegaysa dhoolacadeyntiisa qotada-dheer ee fekerka ah iyo dhaqdhaqaaqa gacantiisa,

Laakiin male-awaalki, kicitankiisa ciyaarta ah. Wuxuu duulimaadkiisa ku qabsadaa dumartii waayeelka ahayd, dadkii agmarayay ee hirowga ahaa, gabadhii yarayd ee katantay, iyo reer-baadiyihi ku qaadanayay habeenadooda doonyahooda ee Fontanka (geesigeenna, aynu u qaadanno inuu markaas marayay dhinaca kanaalka). Wuxuuna si laab-lakac ah qof kasta iyo wax kasta uga tullaa shabaqa suugaanta sida duqsi ku dhex jira shabaq caaro-caaro.

Waana ka dib marka uu ninkaas qariibka ahi ku laabto hoygiisa raaxada leh isagoo wata kayd cusub oo ay maskaxdiisu ku shaqayso, ee uu fadhiisto uuna dhameystiro cashadiisa, oo kaliya uu miyirsadaa, marka Matrona tii u shaqaynaysay—oo markasta feker iyo murug ku jirtay—ay miiska nadiifiso oo ay siiso tuumbadiisa buuriga; markaas ayuu miyirsadaa uuna soo xusuustaa inuu casheeyey, inkastoo uu gabi ahaanba garan ama aan wax fikrad ka haysan sida ay taasi ku dhacday.

Qolkiina gudkur ayaa hadheeyey; naftiisuna waxay noqotay mid murugaysan oo maran. Boqortooyadii male-awaalku waxay ku godol-godol ugu burburtaa hareerihiisa—waxay u burburtaa raad-la'aan iyo shanqadh-la'aan, iyadoo u sabbeysa sida riyo oo kale, uuna isagu laftiisu xusuusan karin wixii uu ku riyoonayay. Laakiin dareen dahsoon ayaa si tartiib ah u gilgila wadnahiisa oo xanuun ku abuura; rabitaan cusub ayaa si soo jiidasho leh u xodxodsada oo u kiciya male-awaalkiisa. Wuxuuna si aan la dareemin u soo maaxiyaa raxan muuqallo cusub ah.

Hadh-dhac iyo deganaansho ayaa ku baaha qolka yar; male-awaalkana waxaa nafaqeeya kalnimada iyo fadhiga—wuxuu si

tartiib ah u holcodaa uuna u karkaraa, sida biyaha ay Matrona-da waayeelka ahi qaxwada ku karsanayso iyadoo si aamusnaan ah ugu dhaqdhaqaysay jikada dhow. Hadda wuxuu u soo boodaa si kedis ah; buuggii uu hadaf-la'aanta u soo qabtayna wuxuu ka dhacaa gacanta riyoodaha (dreamer) intaanu xatta gaadhin bogga saddexaad.

Male-awaalkiisu mar kale ayuu gilgilmaa oo shaqo bilaabaa, mar kalena duni cusub iyo nolol cusub oo sixir leh ayaa hortiisa ku furaysa daaqado ballaadhan. Riyo cusub—farxad cusub! Mawjad cusub oo sun xariir ah oo macaan! Maxay uga dhigan tahay nolosha dhabta ahi isaga! Indhihiisa kharriban marka la eego, aniga iyo adiguba, Nastenkay, waxaynu u nool nahay si gaabis ah, caajis ah, oo dhadhan-la'aan ah;

Sida uu noo arko, dhammaanteen kuma qanacsanin qaddarteena, sidaas ayaanba ugu daallan nahay nolosheenna! Dhab ahaantiina, eeg sida aragtida ugu horraysa kuleel-la'aanta iyo dibro-xumadu uga muuqdaan dhexdeenna... "Miskiimiinta!" ayuu leeyahay riyo ku nooluhu. Mana aha wax lala yaabo inuu sidaas u fikiro!

Eeg muuuqalladaas ashqaraarka ah, ee sida dhibcaha goonsida ah, xarragada, xornimada iyo dhib-la'aanta leh ugu ururaya horkiisa oo samaynaya sawir laab-nooleeya oo sixir ah—kaas oo shakhsiga ugu horreeya ee safka hore kaga jira uu yahay, dabcan, isaga laftiisa, riyoodahayga, iyo naftiisa qaaliga ah. Eeg sida ay uga buuxaan tacabirro kala duwan, iyo sida ay u maaxayso raxan aan dhammaad lahayn oo riyooyin nashaad leh! waxaad weydiinaysaa waxa uu ku riyoonayo. Maxaad se u weydiinaysaa?—Miyayna ahayn wax kasta... kismada gabayaaga, oo marka hore la yaraysto, ka dibna loo gashiyo taajka guusha; saaxiibtinimada uu la leeyahay Hoffmann; Habeenkii St. Bartholomew; Diana Vernon; inuu doorkii geesiga ka ciyaaro qabsashadii Kazan ee uu hoggaaminayay Ivan Vassilyevitch; Clara Mowbray; Effie Deans; shirkii baadariyiinta iyo Jan Huss oo

hortooda taagan; ka soo kaddida meydadka ee opera-da'*Robert the Devil*' (ma xusuusataa muusikadaas, oo leh carfida xabaalaha!); Minna iyo Brenda; dagaalkii Berezina; akhrinta maqaal ama gabay ku dhex jira guriga Countess V. D.; Danton; Cleopatra iyo jacaylkeeda (*ei suoi amanti*); guriga yar ee Kolomna; iyo hoy yar oo uu leeyahay iyadoo dhinaca ay ka fadhido naf oo dhegeysanaysa fiid jiilaal ah, iyadoo afkeeda yar iyo indhaheeda u furaysa sida aad hadda ii dhegesanayso… Maya, Nastenka; maxaa u yaal, maxaa u yaal isaga—midka caajiska iyo raaxada ku dhex jira—ee noloshan aniga iyo adiguba sidaas uga oomannahay? Wuxuu u malaynayaa in tani tahay nolol sabool ah oo liidata, isagoo aan sii odorosin, malaha, ay maalin un u soo jiidhi karto saacadda murugada leh—saacaddaas oo uu hal maalin oo noloshaas liidata ah ku beddelan lahaa dhammaan sannadihiisii male-awaalka ahaa; uuna ku beddelan lahaa xataa maaha kaliya farxad iyo rays, balse iyadoo aanu xor u ahayn inuu kala dooro murugada, qoomamada, iyo tiiraanyada aan xadka lahayn.

Laakiin ilaa hadda baqdin-gelintaasi ma soo gaadhin—waxba ma damcayo, sababtoo ah wuxuu ka sarreeyaa dhammaan rabitaanka, sababtoo ah wuxuu haystaa wax kasta, waa ka dharagsan yahay, sababtoo ah waa fannaankii nolosha ee isaga u gaarka ah, uuna u abuuro itaal kasta si ay u waafaqdo damaaciisii ugu dambeeyay. Waadna og tahay in dunidan sixirka ah ee sheeko-xariirta ahi ay sidaas u dhalanayso si fudud oo dabiici ah! Sida maadaama aanay ahayn dhallanteed! Dhab ahaantii. Wuxuu diyaar u yahay inuu xilliyada qaarkood rumeysto in dhammaan noloshan aanay ahayn wax dareen uun ka dhalatay, ama maqaar-saar (dhallanteed), ama khayaaliga male-awaalka, balse ay tahay mid muuqata, dhab ah, oo adag! Maxay tahay sababta, Nastenka, maxay tahay sababta saacadahaas oo kale uu qofku neefta dib ugu noqoto?

Maxay tahay sababtu, sixir ama laab-lakac aan la fahmi karin darteed ayaa wadne-garaacu u dedejiyaa, oo ay ilmadu uga soo

tiqdaa indhaha riyo-ku noolaha, iyadoo dhabannadiisa isku kakan ee qoyani ay dhalaalayaan, oo naf ahaantiisa oo dhan uu harqinayo dareen qalbi-qaboojis ah oo aan afka lagu tilmaami karin?

Maxay tahay sababta ay habeenno dhan oo hurdo-la'aan ahi uga dhaafaan sida hillaaca, iyagoo ku dhex jira farxad iyo rays aan dhammaad lahayn, oo marka ay iftiinka subaxdu daaqadda ka soo gasho iyadoo casaan ah, ee uu iftiinka waagu qolka mugdiga ah ku harqiyo ilays aan suganayn —sida Petersburg ka dhacda—uu riyoduhu, isagoo kiilsan oo itaaldaran, isku tuuraa sariirtiisa, oo uu hurdada kaga dhacaa iyadoo ay xamaasad farxadeed ku jirto ruuxdiisii xanuunka iyo fekerka u kariyay, uuna wadnahiisa ku jiro xanuun badan oo daal leh?

Ha, Nastenka, qofku isaga ayaa isduufsada oo si miyir-la'aan ah u rumeysta in hammuun iyo jacayl dhab ahi uu gilgilayo naftiisa; wuxuu si miyir la'aan ah u rumeysanayaa inuu jiro wax nool ah oo la taaban karo oo ku dhex jira riyooyinkiisa!

Ma dhallanteed baa? tusaale ahaan, jacaylku wuxuu ku xidhxidhan yahay dhammaan farxaddiisa aan guntooda la gaadhi karin, iyo dhammaan xanuunnadiisa jilicsan ee laabtiisa ku dhex karkaraya... Kaliya eeg isaga, waanad ka dharagsanaan doontaa! Ma rumeysan lahayd, marka aad eegto isaga, Nastenkadayda qaaliga ah, inaanu waligii garanaynin ta u ugu jecelyahay riyooyinkiisa xamaasadda leh? Ma waxay tahay inuu uun ku arkay muuqaallo indho daraan dar, oo uu jacaylkani ahaa riyo kaliya?

Xaqiiqdii waxay ahayd inay sannado badan gacanta-gacanta isku qabsadaan—iyaga oo labadooda uun ah, oo dunida dhan iska reebay, oo mid kastaa noloshiisa kan kale ku aaminay? Xaqiiqdii marka ay saacaddii kala-fogaanshu timaado, waxay ahayd inay laabtiisa ku dul baaroorato iyadoo ku ooyaysa oo tiiraanyoonaysa, iyadoo aan danaynaynin duufaanta ku karkaraysa samada murugaysan hoosteeda, iyadoo aan maqlaynin dabaysha dafaysa oo ka qaadaysa ilmada baalasha indhaheeda madow?

Ma dhici kartaa in waxaas oo dhan ay riyo uun ahaayeen—iyo beertaas gablamayd, ee laga tagay, ee duurraawday, iyadoo leh waddooyinkeedii yar-yaraa ee uu ahalku ku dhaladay, ee go'an, mugdiga ah, halkii ay sidaas farxadda leh ugu wada lugayn jireen, halkii ay ku rajayn jireen, ku tiiraanyoon jireen, isku jeclayeen, ee ay iskugu jacaylayeen muddo dheer, "wakhti dheer si galgacal leh?

Iyo gurigaas qadiimiga ah, halka ay ku qaadatay sannado badan oo kalinimo iyo murugo ah iyadoo la joogta odaygeeda weji-qursoomaha ah—ee markasta aamusan ee laab-cadhooga ah, ee ka cabsiin jiray, iyagoo sida carruurta u xishooda jacaylkooda u gudbiyo midba midkai kale?

Dhibka iyo masiibooyinka ay u dulqaadan jireen, naxdinta iyo baqdinta ay ku jireen, sida uu u eed-la'aa uuna u daahirka u ahaa jacaylkoodu, uuna sida (ma aha inaan sheego, Nastenka) dadka ba'ani u xumaayeen!

Xaqiiqdii wuxuu la kulmay iyadoo ka fog xeebahoodii asalka ahaa, samada qariibka ah hoosteed, koonfurta kulul oo ku dhex jirta magaalada abidka ah ee ilaaheyd, dhalaalka laab-hacooga ee ciyaarta habaysan iyadoo muusikada laga shanqadh-duulayo, dhexdeeda sarada weyn ee *palazzo (dhab ahaan waa inay palazzo ahayd!), oo ku dhex hafatay bad ilays ah, balakoonka, oo lagu lebbisay reexaanta iyo rooska, halka ay marka ay garato, ay si deddeg ah uga bixiso maaskarada iyadoo hoos u xashxashaysa,'Waan xoroobay,' oo ay isku tuurayso iyadoo gaddanaysa gacantiisa, iyadoo leh belbel farxadeed, oo midba kii kale isku dhejiyo, hal ilbidhiqsi gudaheed waxay ku xusuus-baab'ayaan murugadoodii, kala-fogaanshahoodii iyo dhammaan masiibooyinkoodii, gurigii mugdiga ahaa, odaygii iyo beertii murugaysnayd ee dhulkaas fog, iyo kursigii halka ay shunfeeyntiisi/shummahiisii ugu dambeysay ee xamaasada lahayd ay uga soo go'day gacantiisa ee itaalka daran laab-lakaca iyo rajo-dhilka.*

Oo, Nastenka, waa inaad qirto inuu qofku si kedis ah u u bilaabi lahaa, uu jahwareer muujin lahaa, uuna u gaduudan lahaa sida arday yar oo hadda uun jeebka gashaday tufaax uu ka soo xaday beerta

jaarkiisa. Marka uu marti aan la casumin—nin garbo-weyn, oo dheer, oo ruux madadaalo iyo kaftan jecel ah—uu soo furo albaabkaaga oo uu dhawaaqo isagoo ka dhigaya sida inayna waxbana dhacin:'Wiilkayga qaaliga ahow, daqiiqaddan uun baan ka imid Pavlovsk.'

Ilaahayow! ninkii waayeelka ahaa wuu geeriyooday, farxad aan afka lagu tilmaami karin ayaa garabka ku haysa—dadkiina waxay ka soo galayaan Pavlovsk!"

Markii aan soo afjaray baaqaygii damqashada lahaa, ayaan si naxariis-doon ah u hakaday. Waxaan xusuustay inuu igu dhacay rabitaan xoog leh oo aan ku qasbayay naftayda inaan qoslo, maadaama aan mar horeba dareemayay in ruux xaasid ahi uu ka dhex gilgilayo naftayda, in dhuuntayda gunti ku taagantahay, in gadhkaygu uu bilaabay inuu gaddamo, indhahayguna ay sii qoyayeen oo ay ilmadu sii buuxsamayso.

Waxaan ka filayay Nastenka—oo i dhegesanaysay iyadoo furaysa indhaheeda garashada leh—inay ku dhufan doonto qosolkeeda carruurnimada ahaa ee ay san maareyn karin; waxaana mar horeba ka qoomamaynayay inaan intas la gaadhay, inaan sabab-la'aan u sifeeyay wixii waqtiga dheer hurinayey wadnahayga, oo aan ka hadli karayay sida wax ku qoran qoraal diyaarsan, sababtoo ah waxaan naftayda uga balan qaaday inaan qofna la wadaagin, haddana ma iska celin karin inaan akhriyo oo aan qirasho sameeyo, iyadoo aanan xatta ka filaynin in la i fahmo; balse waxan la yaabay inay nastenka noqotay mid aamusta, iyadoo xoogaa sugtay, ka dibna waxay si yar oo tartiib ah u qabatay gacantayda, waxayna iyadoo xishood iyo damqasho ka muuqato I weyddiisay—

"Xaasha! Hubaal noloshaada oo dhan miyaad sidaas u noolayd?"

"Noloshayda oo dhan, Nastenka," ayaan ugu jawaabay; "noloshayda oo dhan, waxay iigu muuqata inaan sidaas ku sii socon doono ilaa dhammaadka."

“Maya, taasi ma socanayso,” ayay tiri iyadoo an daganayn, “ma aha inay sidaas noqoto; malaha, anigana noloshayda oo dhan ayaan ku garab dhagaxaysan doonaa ayeeyday dhinaceeda. Ma og tahay, haba yaraatee ma wanaagsana in sidaas loo noolaado?”

“Waan ogahay, Nastenka, waan ogahay!” ayaan dhahay, aniga oo aan xakameyn karin dareenkayga karkaraya. “Waxaanan hadda garawsaday, ka badan intii hore oo dhan, inaan khasaariyay sannadaydii ugu wanaagsanayd! Haddana waan ogahay oo si ka sii xanuun badan ayaan u damqanayaa markaan garawsaday in Eebbe I kaai soo diray adiga, si aad taas iigu sheegto oo aad ii tusto. Hadda oo aan dhinacaga fadhiyo oo aan kula hadlayo, waxay iigu muuqataa wax qariib ah inaan ka fikiro mustaqbalka—sababtoo ah mustaqbalka wuxuu mar kale yahay kalinimo, mar kale waa noloshan gufeysan ee bilaashka ah; maxaase ii baaqi ah oo aan ku riyoon doonaa marka aan dhabtii dhinacaga sidaas ugu soo farxay! alla, Eebbe ha ku barakeeyo, boqoradeyda qaaliga ah, maadaama aanad markii horeba i cayrin, ee aad ii suurta-galisay inaan iraahdo: ugu yaraan laba fiid (habeen) ayaan noolaa.”

“Oo, maya, maya!” ayay tiri Nastenka iyadoo ilmadu ay ka qulquleyso dhabanadeeda. “Maya, ma aha inay sidaas noqoto mar dambe; ma aha inaynu sidaas u kala go'no! Maxay yihiin laba fiid?”

“Oo, Nastenka! Ma og tahay heerka aad I xasilisay naftayda? Ma og tahay hadda inaanan naftayda si xun isku la hadli doonin mar dambe, sida aan waqtiyo qaarkood u si uun isku canaanan jiray? Ma og tahay in aan iskaga baajin doono tiiraanyada, dambiga iyo gefka nolosheyda? Sababtoo ah nolosha noocan ahi waa dambi iyo gef. Ha u malaynin inaan wax buunbuuninayay waa iga dhab, marnaba haku fikirin taas nastenka.

Waayo mararka qaarkood murugo aad u daran ayaa i qabsata, murugo aan la qiyaasi karin...

Sababtoo ah waqtiyadaas waxay ila noqotaa inaanan awoodin inaan nolol dhab ah ka bilaabo dunida dhabta ah; waxay ila noqotaa

inaan lumiyay dhammaan xiriirkii iyo dareenkii dabiiciga ahaa ee igu xiriirin lahaa waxa jira iyo nolosha dhabta ah.

Ugu dambayntiina waxaan bilaabaa inaan naftayda habaaro; sababtoo ah ka dib habeennadayda mala-awaalka ah. Waxaa ii yimaada waqtiyo aan miyir-qabkii caadiga ahaa kusoo laabto—waqtiyadaasna waa kuwo aad u naxdin badan!

Dhanka kale. Waxaad maqashaa guuxa iyo qaylada dadka faraha badan ee ku dhex qulqulaya wareegga nolosha ee kugu hareeraysan; waxaad maqashaa. Waxaadna arkaysaa dad dhab ahaan noloshooda u nool,

Waxaad arkaysaa in noloshu iyaga aanay ka xidhnaan, in aan noloshoodu u libdhin sida riyo ama dhalanteed; waxaad arkaysaa in noloshoodu mar walba dib isu cusboonaysiinayso, mar walbana dhalinyaranimadeeda ku jirto, oo aan saacad ka mid ahi la mid ahayn saacadda kale.

Halka mala-awaalku yahay mid aan ruux lahayn, caajis ah ilaa heer uu noqdo wax aan macne lahayn, si fududna u baqda; oo addoon u ah mugdiga, addoon u ah fikirka, addoonna u ah daruurta ugu horreysa ee qorraxda qarisa, oo murugo ku soo rogta qalbiyada magaalada Petersburg, qalbiyadaas oo qorraxda sida weyn ugu hanqal taagaya—balse maxay tahay murugada mala-awaalka saaran!

Qofku wuxuu dareemayaa in mala-awaalkan aan dhammaadka lahayn uu ugu dambayn daalay, tabar-darraystayna uu ka noqday adeegsiga aan kala go'a lahayn; waayo qofku wuxuu bilaabayaa inuu qaangaadho, isagoo ka koraya oo ka gudbaya himilooyinkii iyo riyooyinkii uu waagii hore jeclaa. Waxay u kala burburayaan jajabyo, u kala daadanayaan jajab; haddii aanay jirin nolol kale oo la haysto, waa in nolol cusub laga dhistaa jajabyadaas.

Haddana naftu waxay u ooman tahay wax kale, waxayna u hanqal taagaysaa wax kale!

Riyo-maaluhu wuxuu si aan waxba tarayn ugu dhex gur-gurtaa riyooyinkiisii hore, sidii qof dhuxulihii bakhtiyay dhexdiisa ka

raadinaya dhimbiil yar; isagoo doonaya inuu dabkii mar kale kiciyo, uu holciyo, si uu qalbigiisa qaboobay ugu diiriyo dabkii dib loo huriyay, isla markaana uu mar kale ugu soo nooleeyo wax kasta oo mar ahaan jiray kuwo sidaas u macaan, qalbigiisana taaban jiray, dhiiggiisana kicin jiray, indhihiisana ilmo ka soo daadin jiray, oo si raaxo iyo qurux leh isaga u khiyaamayn jiray!

Ma garanaysaa, Nastenka, heerka aan hadda marayo?

Ma garanaysaa in hadda la igu khasbay inaan xuso sannad-guurada dareennadaydii—sannad-guurada riyooyinki sidaas u macaanaa, kuwaas oo aan weligood dhab ahaan jirin?

Waayo sannad-guuradan waxaan xusaa anigoo xusuusanaya isla riyooyinkaas nacasnimada ah ee dhalanteedka uun ahaa—waxaanan sidaas u sameeyaa sababtoo ah riyooyinkaas nacasnimada ahi mar dambe ma jiraan, sababtoo ah wax aan ku kasbado oo aan dib ugu helo ma haysto.

Waad ogtahay, xitaa riyooyinku bilaash kuma yimaadaan!

Ma ogtahay inaan hadda jeclahay inaan dib u milicsado, oo maalmo cayiman aan booqdo meelihii aan mar uun, sida aan anigu u garanayay, ku farxi jiray?

Waxaan jeclahay inaan maanta aan joogo ku dhiso xusuustii shalay ee aan dib loo soo celin karin, oo aan labadooda isu waafajiyo; marar badanna waxaan Petersburg dhex mushaaxo sidii hadh aan meel u socon, murugaysan oo niyad-jabsan, anigoo dhex maraya jidadkeeda iyo laamiyada yaryar ee qalloocan.

Xusuuso noocee ah ayay yihiin!

Tusaale ahaan, in aad xasuusato in halkan, sannad keliya ka hor, isla waqtigan, isla saacaddan, oo aad taagan tahay laamigan, aad u dhex mushaaxaysay adigoo maanta oo kale kelinimo iyo niyad-jab la ildaran.

Markaas waxaad xasuusataa in riyooyinkaagii xilligaas ay iyaguna murugo lahaayeen; haddana, inkasta oo wixii hore aanay ka

wanaagsanaan jirin. Waxaad si uun u dareemaysaa inay ka wanaagsanayd sida maanta.

Waxaad mooddaa in noloshu markaas ka xasilloonayd, in aad xor ka ahayd fikirrada madow ee hadda ku daba socda; in aad ka xor ahayd qoomamada damiirka—qoomamada madow, culus, ee gudaha si joogto ah kuu ciqaabaysa, taas oo hadda aan habeen iyo maalin midna ii oggolaanayn inaan nasto. Oo qofku wuxuu is weydiiyaa**:** xaggee bay tageen riyooyinkaygii?

Markaas ayuu madaxa ruxaa oo yiraahdaa: **"**Sidee bay sannaduhu u ordayaan!"

Haddana mar kale ayuu is weydiiyaa: "Maxaan ku sameeyay sannadihii noloshayda? Xaggee ayaan ku lumiyey maalmihii iigu quruxda badnaa? Ma noolaa mise maan nooleyn?"

Dabadeed wuxuu naftiisa ku yiraahdaa:

"Bal eeg… bal eeg sida dunidu u sii dhamaanayso."

Sannado kale ayaa soo dhaafi doona, dabadeed waxaa iman doona kelinimo madow oo murugo leh; ka dibna waxaa iman doona gabowga, oo usha ku tiirsan, jirkiisuna gariirayo; gabowga dabadiina waxaa iman doona rafaad iyo cidlo**.**

Dunidii mala-awaalka ahayd ee aad ku noolayd way sii libdhi doontaa, riyooyinkaaguna way sii engegi doonaan oo dhiman doonaan; waxayna u dhici doonaan sida caleemaha huruudda ah ee geedaha uga daata...

Ah, Nastenka!

Waad ogtahay inay murugo weyn tahay in qofku kaligiis ahaado—kaligiis oo aan cidina la joogin—oo xataa uusan haysan wax uu ka shallaayo, wax uu u ooyo, qof uu ku yiraahdo:

"Waxaas ayaan waayay."

Waxba… gabi ahaanba waxba...

Waayo wax kasta oo aad lumisay, wax kasta oo aad moodaysay inay noloshaada macne u lahaayeen—dhammaantood waxba ma

ahayn; waxay ahaayeen wax aan qiimo lahayn, wax fudud oo madhan.

Waxba ma jirin…

Riyooyin uun bay ahaayeen!"

"Kaalay, dareenkayga mar dambe ha ku dheelin," ayay Nastenka tidhi, iyadoo tirtiraysa ilmo dhabankeeda ku soo qulqulaysa.

"Hadda waa dhammaatay! Hadda labadeennu waan wada joognaa. Hadda, wax kasta oo igu dhaca, weligeen ma kala tegi doonno.

I maqal; anigu waxaan ahay gabar da'yar, waxbarasho badanna ma aanan helin, inkastoo ayeeyday ay macallin ii keentay. Laakiin runtii waan ku fahmayaa, waayo wax kasta oo aad hadda ka sheekaysay, aniguna waan soo maray—waagii ay ayeeyday maradeeda igu xidhi jirtay.

Dabcan, anigu sidaada oo kale si qurux badan uma aanan sheegi kari lahayn; waxbarasho ma lihi," ayay si xishood leh ugu dartay, iyadoo weli qalbigeeda ka dareemaysa ixtiraam ay i hayso hadallada murugada leh ee xeeladda badan iyo qaab hadalka sare ee aan wax ugu cabbiray.

"Laakiin aad ayaan ugu faraxsanahay inaad si buuxda oo dhamayska tiran iigu furfurnaato.

Hadda si fiican ayaan kuu bartay; si qoto dheer ayaan ku fahmay.

Oo ma ogtahay waxa aan doonayo?

Aniguna waxaan rabaa inaan taariikhdayda kuu sheego—wax walba, anigoon waxba qarin.

Markaas dabadeed waa inaad talo i siisaa.

Waxaad tahay nin aad u caqli badan; ma ii ballanqaadaysaa inaad talo i siin doonto?"

"Ah, Nastenka!" ayaan ku dhawaaqay. "Inkastoo aanan waligay qof talo siin—gaar ahaan talo wax-ku-ool ah—haddana hadda

waxaan arkayaa in haddii aan sidan sii wadno, ay arrintu noqon doonto mid aad u macquul ah, oo midkeenba kan kale siin doono talooyin badan oo wax-ku-ool ah!"

"Haye, Nastenkadayda quruxda badan, talo noocee ah ayaad rabtaa? Si daacad ah iigu sheeg; xilligan aad ayaan u faraxsanahay, aad ayaan u rayraynayaa. Waxaana dareemayaa inaan ahay nin geesi ah oo caqli badan, sidaas darteed ma adkaan doonto inaan erayo kuu helo."

"Maya, maya!" ayay Nastenka hadalkii iga dhex gashay iyadoo qoslaysa. "Ma doonayo talo caqli iyo xigmad keliya leh; waxaan rabaa talo diirran oo walaaltinimo leh—sida adigoo noloshaada oo dhan i jeclaa oo ii danaynayay!"

"Waan ogolahay, Nastenka, waan aqbalay!" ayaan si farxad leh ugu dhawaaqay. "Xataa haddii aan labaatan sannadood ku jeclaan lahaa oo aan kuu danayn lahaa, haddana kuma aanan jeclaan lahayn sida aan hadda kuu jeclahay."

"Gacantaada," ayay tidhi Nastenka.

"Waa tan," ayaan iri, anigoo gacantayda u dhiibaya. "Ee aynu sheekadayda bilowno!"

TAARIIKHDA NASTENKA

"Kala bar sheekadayda hore ayaad u taqaan—taas oo ah. Waxaad ogtahay inaan leeyahay ayeeyo duq ah..."

"Haddii kala bar sheekada inta hadhay ay sidaas oo kale u gaaban yahay..." ayaan hadalkii ka dhex galay anigoo qoslaya.

"Iska aamus oo i dhagayso. Marka ugu horraysa waa inaad ii ballanqaaddaa inaadan hadalkayga iga dhex gelin, haddii kale waxaa laga yaabaa inaan hadalku isku dhex yaaco! Kaalay, si deggan ii dhagayso.

"Waxaan leeyahay ayeeyo duq ah. Waxaan u gacan galay anigoo ah weli gabar aad u yar, waayo aabbahay iyo hooyadayba way dhinteen.

Waxay u badan tahay in ayeeyday mar hore nolol ka dhaqaale badnayd tan ay hadda ku nooshahay, waayo mar walba waxay xusuusataa waqtiyadii wanaagsanaa ee ay soo martay.

Waxay i bartay af-Faransiis, dabadeedna waxay ii keentay macallin wax i bara. Markii aan shan iyo toban jir ahaa—haddana waxaan jiraa toddoba iyo toban—waxaan joojinnay casharradii.

Wakhtigaas ayaan bilaabay inaan xumaado oo aan dhibaatooyin yaryar sameeyo; waxa aan sameeyay kuuma sheegi doono. Waxaa kugu filan inaad ogaato inuusan ahayn wax aad u weyn.

Laakiin subax maalmaha ka mid ah ayay ayeeyday ii yeedhay, waxayna igu tidhi, maadaama ay indho la'ayd, inaysan awoodin inay si fiican ii ilaaliso.

Markaas ayay irbad soo qaadatay, dharkaygiina dharkeeda ayay ku gunnuday, waxayna tidhi:

'Sidan ayaynu inta nolosheenna ka hadhay u wada fadhiisan doonnaa, haddii, dabcan, aad noqon waydo gabar wanaagsan.'

Run ahaantii, bilowgii ma jirin wax aan uga baxsan karo; waa inaan shaqeeyo, wax akhriyo, wax barto—waxaas oo dhanna sameeyo anigoo ayeeyday agteeda fadhiya.

Mar ayaan isku dayay inaan khiyaaneeyo. Waxaana Fekla ku qanciyay inay meesheyda fariisato.

Fekla waa gabadha guriga ka shaqaysa; wayna yar dhaga la'dahay.

Markaas Fekla ayaa meesheyda fadhiisatay. Ayeeyday xilligaas waxay ku hurudday kursigeeda gacmaha leh, aniguna waxaan u baxay inaan saaxiibtay soo booqdo.

Hagaag, arrintu waxay ku dhammaatay dhibaato.

Ayeeyday ayaa soo toostay anigoo maqan, waxayna bilowday inay su'aalo waydiiso fekla; iyadu waxay moodaysay inaan weli meesheyda si deggan u fadhiyo.

Fekla waxay aragtay in ayeeyday wax waydiinayso, laakiin ma ay fahmin waxa ay ahayd su'aashu; waxayna garan weyday waxay samayso.

Markaas ayay maradi furtay, wayna carartay..."

Halkaas ayay Nastenka hadalkii ku hakisay, dabadeedna qosol ayay bilowday. Aniguna waan la qoslay.

Isla markiiba halkii ay hadalka kasii waday:

"Waxaan kuu sheegayaa arrin: ayeeyday ha ku qoslin. Anigu waan qoslayaa sababtoo ah arrintu waa qosol badan tahay... Maxaan sameeyaa, maadaama ayeeyday sidaas tahay; haddana, si uun waan u jeclahay.

Hagaag, markaas runtii waan ku ciqaabmay. Isla markiiba waa inaan meesheyda fariistaa, intaas ka dibna la ima oggolaan inaan dhaqaaqo.

"alla. Waxaan illoobay inaan kuu sheego in gurigeennu annaga leenahay—ama dhab ahaantii ayeeyday leedahay. Waa guri yar oo alwaax ah, oo leh saddex daaqadood; gurigu waa duug sida ayeeyday oo kale. Waxaana dusha kaga yaal dabaq yar.

Hagaag, markaas waxaa dabaqaas yar u soo guuray nin kirayste cusub."

"Markaa waxaad hore u lahaydeen kirayste duq ah," ayaan si aan ula kac ahayn u iri.

"Haa, dabcan," ayay Nastenka ku jawaabtay, "oo weliba wuxuu ahaa nin carrabkiisa si wanaagsan u xakamayn jiray. Runtii ma af dheerayn.

Wuxuu ahaa oday yar oo carrab la', indho la', lugahana naafo ka ahaa, jirkiisuna qallalay oo yaraaday; ugu dambayntiina wuu sii noolaan kari waayay, wuuna dhintay.

Sidaas darteed waa inaan helnaa kirayste cusub, waayo kirayste la'aantiis ma noolaan karno—kirada guriga, oo ay weheliso lacagta hawlgabka ee ayeeyday, ayaa ah waxa keliya ee aan haysanno.

Laakiin kiraystaha cusub, nasiib wanaag. Wuxuu noqday nin dhallinyaro ah, shisheeye ah oo aan deegaankan u dhalan.

Maadaama uusan kirada ka gorgortamin, ayeeyday way ka aqbashay inuu guriga dego. Dabadeedna waxay i waydiisay:

'Ii sheeg, Nastenka, ninka guriga kiraystay muxuu yahay? Dhallinyaro miyaa mise waa nin da' ah?'

Ma aanan doonayn inaan been sheego, sidaas darteed waxaan ayeeyday ugu jawaabay inuusan si dhab ah u ahayn nin dhallinyaro ah, laakiin uusan ahayn nin da' ahna.

'Oo muuqaalkiisu ma wanaagsan yahay?' ayay ayeeyday I waydiisay.

Mar kale ma aanan doonayn inaan been sheego.

'Haa, muuqaalkiisu waa wanaagsan yahay, ayeeyo,' ayaan iri.

Markaas ayay ayeeyday tidhi:

'Alla dhib badanaa, alla dhib badanaa! Waxaan taas kuugu sheegayaa, ayeeyo, si aadan u bilaabin inaad isaga daryeesho oo aad indhaha ku hayso. Bal dunidu maanta halka ay marayso eeg! Nin Kirayste ah oo da'yar oo sidaas ah, weliba muuqaal wanaagsan leeyahay! Waagii hore arrimuhu aad bay sidan uga duwanaayeen!'"

"Ayeeyday mar walba waxay u xiisi jirtay waayihii hore—waagii hore iyadaa da' yarayd, qorraxduna way diirranayd. Xataa caanaha labeenta ah si fudud uma dhananaan jirin. Wax walba waxay ahayd:'Waagii hore sidaas ma ahayn!'

Aniguna si deggan ayaan u fadhiisan jiray, carrabkaygana waan ka adkaan jiray, anigoo is leh: Maxay ayeeyday arrintan iigu soo hadal qaaday? Maxay ii waydiisay in kiraystuhu yahay nin dhallinyaro ah oo qurux badan?

Laakiin intaas ayay ku ekaan jirtay. Waan iska fikiri jiray, dabadeed tolmadii ayaan mar kale iska wadan jiray, sharabaadkaygana waan sii toli jiray, ugu dambayntiina arrintaas waan illoobay.

"Haddaba, subax maalmaha ka mid ah, ayuu kiraystihii noo yimid. Wuxuu ka hadlayay ballan uu ku qaatay inuu qolalkiisa waraaq derbiyada kaga dhejiyo. Hadal baa hadal dhaliyay.

Ayeeyday oo hadal badan ayaa markaas tiri:

' Nastenka, tag qolkayga jiifka gal oo ii keen buuggayga xisaabta.'

Isla markiiba waan kacay. Jidhkaygii oo dhan ayaa casaaday xishood dartiis—mana garanayo sababta. Waxaan illoobayba inaan weli ayeeyday maradeeda ku xidhanahay. Halkii aan si aamusnaan ah irbadda uga furi lahaa si aanu kirooluhu ii arkin, ayaan hal mar booday, ilaa kursigii ayeeyday uu dhaqaaqay.

Markii aan ogaaday inuu ninkii kirooluhu hadda wax walba fahmay, khajilaadi ayaa wejigayga ku wada fiday. Waan istaagay anigoo sidii qof xabbad lagu dhuftay meel ku dhaggan, dabadeedna si kedis ah ayaan u ooyay. Ceeb iyo xishood ayaa igu habsaday, mana garanayn meel aan wejigayga u jeediyo.

Ayeeyday ayaa igu qaylisay:

'Maxaad sugaysaa?'

Aniguna intaas ka dib ayaan sii wareeray oo xaaladdii iga sii dartay.

Kiraystihii markuu arkay inaan isaga dartii la xishoonayo, si edeb leh ayuu iiga foorорsaday, dabadeedna isla markiiba wuu baxay."

"Intaas ka dib, cod kasta oo aan marinka guriga ka maqlo waxaan moodi jiray inuu yahay kan ugu dambeeya ee aan nolosha ku maqlo.'*Waa kiraystihii,'* ayaan is odhan jiray. Si dhuumasho ah ayaan irbaddii dharkayga uga furi jiray, anigoo is leh bal haddii uu yimaado si uusan ku arkin. Laakiin mar kasta waxaan ogaan jiray inuusan isaga ahayn; waligiisna ma iman.

Laba toddobaad ayaa sidaas ku dhaafay.

Maalin maalmaha ka mid ah, kiraystihii wuxuu Fiyokla usoo dhiibay farriin uu ku leeyahay inuu hayo buugaag badan oo Faransiis ah, dhammaantoodna ay yihiin buugaag wanaagsan oo aan akhrisan karo; sidaas darteed. Wuxuu waydiiyay, ayeeyday miyaanay jeclaan lahayn inay akhrido buug si aysan u caajisin?

Ayeeyday si mahadnaq leh ayay u aqbashay, laakiin haddana mar walba waxay ku celcelinaysay inay ogaato in buugaagtu yihiin kuwo akhlaaq wanaagsan leh iyo in kale; waayo haddii buugaagtu xumaan ku jiraan, arrintu halkaas ayay ku dhammaan lahayd—waxaa laga baran lahaa xumaan.

'Oo maxaan ka baran lahaa, ayeeyo? Maxaa buugaagtaas ku qoran?'

'Ah,' ayay tiri 'waxay ka sheekaynayaan sida wiilasha dhallinyaradu u sasabaan gabdhaha dhawrsan; sida ay iyagoo marmarsiiyo ka dhiganaya inay guursanayaan uga kaxeystaan guryaha waalidkood; dabadeedna, marka ay helaan waxay doonayeen, uga tagaan gabdhahaas nasiibka darran oo qaddarkooda ku dayacan, ilaa ay ugu dambayn si naxdin iyo murugo leh u halaagaan.

Buugaag badan ayaan akhriyay,' ayay ayeeyday tidhi,'oo si wanaagsan oo faahfaahsan loogu qoray arrimahaas, ilaa qofku habeenkii oo dhan soo jeedo oo uu si qarsoodi ah u akhriyo.

Sidaa darteed, iska jir oo ha akhrin buugaagtaas, Nastenka,' ayay tidhi.'Buugaag noocee ah ayuu kuu soo diray?"'

'Dhammaantood waa riwaayadaha Walter Scott, ayeeyo.'

'Riwaayadaha Walter Scott aa! Laakiin sug... bal ma khiyaano baa arrintan ku qarsoon? Bal eeg jaldiga hoostiisa in warqad jacayl soo dhex galiyay buuga?'

'Maya, ayeeyo,' ayaan iri,'warqad jacayl ah kuma jirto.'

'Laakiin bal eeg hoosta daboolka buugga; mararka qaarkood halkaas ayay ku dhex qariyaan, kuwaas dhagar-qabayaashu!'

'Maya, ayeeyo, waxba kuma jiraan hoosta daboolka.'

'Haye, markaas waa hagaag.'

"Sidaas ayaannu ku bilownay akhrinta Walter Scott, muddo bil ku dhowna waxaan akhrinnay ku dhowaad kala badh buugaagtii.

Dabadeed buugaag kale ayuu marba marka ka dambaysa noo soo diri jiray. Xataa Pushkin buugtiisa ayuu noo soo diray; ilaa ugu dambayntii aanan buug la'aantiis sii noolaan karin, oo aan iska illoobay riyooyinkii ahaa sida ay u qurux badnaan lahayd inaan guursado amiir Shiine ah.

"Sidaas ayay arrimuhu ahaayeen ilaa maalin maalmaha ka mid ah aan si kadis ah jaranjarada ugula kulmay kiraystihii.

Ayeeyday ayaa ii dirtay inaan wax soo qaado.

Wuu istaagay; aniguna waan khajilay, isaguna wuu xishooday. Hase yeeshee wuu qoslay, subax wanaagsan ayuu ii dhahay. Wuxuuna i waydiiyay ayeeyday xaaladdeeda. Dabadeed wuxuu yidhi:

'Haddaba, buugaagtii ma akhriday?'

Waxaan ugu jawaabay inaan akhriyey.

'Midkee ayaad ugu jeceshahay?' ayuu i waydiiyay.

Waxaan iri:

'*Ivanhoe* ayaan ugu jeclahay, laakiin Pushkin ayaan dhammaantood ka si jecelahay.'

Halkaas ayay sheekadeennii ku ekaatay markaas."

"Toddobaad ka dib ayaan haddana jaranjarada kula kulmay. Markaas ayeeyday ima aysan dirin; anigaa doonayay inaan wax ii gaar ah soo doonto. Waxay ahayd wax yar ka dib labadi duhurnimo, waana waqtigii uu ninka kiraystuhu caadi ahaan guriga ku soo noqon jiray.

'Galab wanaagsan,' ayuu yidhi.

Aniguna waxan ugu jawaabay,'Galab wanaagsan.'

'Miyaadan ku caajisin,' ayuu yidhi,'maalinta oo dhan inaad ayeeydaa la fadhido?'

Markuu sidaas i waydiiyay, waan khajilay, mana garanayo sababta. Xishood badan baan dareemay, haddana waxaan dareemay in la i dhibay—malaha sababtu waxay ahayd in dad kale ay bilaabeen inay arrintaas iiga hadlaan oo i waydiiyaan.

Waxaan doonayay inaan iska tago anigoon u jawaabin, laakiin awood uma aanan yeelan inaan sidaas sameeyo.

'Bal i maqal,' ayuu yidhi.'Waxaad tahay gabar wanaagsan. Iga raalli noqo inaan sidaas kula hadlo, laakiin waxaan kuu xaqiijinayaa inaan wanaaggaaga uga dan leeyahay sida ayeeyadaa oo kale. Saaxiibo ma leedahay kuwaas oo aad booqato?'

Waxaan u sheegay inaanan saaxiibbo lahayn; saaxiib keliya oo aan lahaa waxay ahayd Mashenka, iyaduna waxay u guurtay Pskov.

'Bal i maqal,' ayuu yidhi.'Ma jeclaan lahayd inaad masraxa tagto oo aad riwaayad daawato, oo aniga I raacdo?'

'Masraxa? Laakiin ayeeyday maxaan ka yeelaa?'

'Laakiin waa inaad tagtaa ayeeydaa oo an ku ogayn,' ayuu yidhi.

'Maya,' ayaan ku idhi.'Ma doonayo inaan ayeeyday khiyaaneeyo. Nabadgelyo.'

'Hagaag, nabad diino,' ayuu ku jawaabay, dabadeedna wax kale ma uu san odhan."

Cashadii ka dib ayuu noo yimid; muddo dheer ayuu ayeeyday la sheekaysanayay. Wuxuuna waydiiyay inay marna meel u baxdo, iyo

inay dad ay taqaano jiraan iyo in kale. Dabadeed si kedis ah ayuu u yidhi:

"Caawa waxaan masraxa opera-ga ka qabsaday kursi gaar ah; waxaa la jilayaa *Timo-jarihii Seville*. Saaxiibbaday ayaa markii hore doonayay inay tagaan, laakiin dabadeed way ka noqdeen, sidaas darteed tigidhkii aniga ayuu gacanta iigu haray."

"*Timo-jarihii Seville!*" ayay ayeeyday ku dhawaaqday. "Oo ma kii ay waagii hore jili jireen baa?"

"Haa, isla timo-jarihii," ayuu yidhi, isagoo i eegaya.

Waan gartay waxa uu ula jeeday, wejigaygana casaan baa qabsaday, wadnahayguna wuxuu bilaabay inuu si xoog leh ii garaaco, anigoo xiiso iyo filanwaa la gariiraya.

"Hubaal waan garanayaa," ayay ayeeyday tidhi. "Bal eeg, waagii hore aniga qudhaydu waxaan matali jiray doorka *Rosina*, xaflad gaar ah!"

"Haddaba maanta miyaanad jeclayn inaad tagto?" ayuu kiroolihi yidhi. "Haddii kale tigidhkaygu waa khasaarayaa."

"Maxaa noo diidey inaan tagno?" ayay ayeeyday tidhi. "Maxaynu u tegi weynay? Nastenka xataa weligeed masrax ma tegin."

alla rabbiyoow, farxad intee le'eg bay ii ahayd!

Isla markiiba waan is diyaarinay, dharkayagii ugu quruxda badnaa ayaan xidhanay, dabadeedna waan dhaqaaqnay. Inkastoo ayeeyday indho la'ayd, haddana waxay jeclayd inay muusigga maqasho; weliba waa qof waayeel ah oo qalbi wanaagsan, waxa ugu weyn ee ay danaynaysayna wuxuu ahaa inay aniga i farxad geliso. Haddii aysan iyadu sidaas ii jeclaan lahayn, annagu iskayaga weligeen masraxa uma aadeen.

Sida aan ula cajabay *Timo-jarihii Seville* ka dib, kama sheekayn doono; laakiin fiidkii oo dhan kiraystahayagu si wanaagsan buu ii eegayay, si wanaagsan buuna ila hadlayay, markaas ayaan markiiba

gartay inuu subaxdii ula jeeday inuu i tijaabiyo markii uu ii soo bandhigay inaan keligay isaga masraxa u raaco.

Bal farxaddu waxay ahayd wax aan la qiyaasi karin! Habeenkaas waxaan seexday anigoo aad u muxiboonaya, aadna u faraxsan; wadnahaygu sidaas buu u garaacayay oo xataa qandho yar ayaan dareemayay, habeenkiina oo dhan waxaan ku qarwayey *Timo-jarihii Seville*.

Waxaan filayay in wixii ka dambeeyay intaas uu kiraystuhu marba marka ka dambaysa noo soo booqan doono, laakiin sidaas gabi ahaanba may noqon. Gabi ahaanba wuu joojiyay imaatinkii. Bishiiba hal mar ayuu soo muuqan jiray, markaasna wuxuu u iman jiray oo keliya inuu nagu casuumo masraxa. Laba jeer oo kale ayaannu tagnay.

Laakiin anigu arrintaas haba yaraatee kuma farxin; waxaan gartay inuu kaliya ii naxayo, maadaama ayeeyday si adag ii xannibtay oo aanan xorriyad badan haysan, intaas oo keliya ayaana ahayd.

Marba marka ka dambaysa. Waxaan sii noqday qof sii kacsan oo aan degganaan karin. Meel ma fariisan karin, waxna ma akhrisan karin, waxna ma qaban karin; mararka qaarkood waan qosli jiray oo wax baan samayn jiray si aan ayeeyday uga xanaajiyo, mar kalena waan ooyi jiray. Ugu dambayntii waan caatoobay. Waxaana ku dhowaaday inaan bukoodo.

Xilligii opera-duna wuu dhammaaday, kiraystihiina gabi ahaanba wuu joojiyay inuu nasoo booqdo. Mar kasta oo aanu is aragno—dabcan, had iyo jeer isla jaranjaradaas—si aamusan oo aad u kakan ayuu ii salaami jiray, isagoo ad mooddo inuusan doonayn inuu ila hadlo, dabadeedna wuxuu u degi jiray dhanka albaabka hore.

Aniguna waxaan sii taagnaan jiray jaranjarada dhexdeeda, anigoo wajigaygu casaan noqday sida khudaarta jeeriga, waayo dhiiggii oo dhan ayaa madaxayga ku soo yaaci jiray marka aan arko isaga.

Haddaba dhammaadkii ayaa soo dhawaaday.

Sannad keliya ka hor, bishii May, ayuu ninki kiraystuhu noo yimid. Wuxuuna ayeeyday u sheegay inuu hawshiisii halkan ku soo dhammeeyay, sidaas darteedna ay qasab tahay inuu Moscow ku laabto muddo sannad ah.

Markii aan taas maqlay, kursi ayaan ku dhacay anigoo naf la'; ayeeyday se waxba ma ay dareemin. Isagoo noo sheegay inuu naga tegayo, ayuu na sagootiyay dabadeedna iska baxay.

Maxaan samayn lahaa? Waan fikiray oo fikiray, waan murugooday oo murugooday, ugu dambayntiina go'aan ayan gaadhay.

Maalintii xigtay ayuu bixi lahaa, aniguna waxaan go'aansaday inaan wax walba soo afjaro fiidkaas, marka ayeeyday seexato.

Sidaas ayay noqotay.

Dharkaygii oo dhan ayaan xidhxidhay, dharkii hoose ee aan u baahnaa oo dhan ayaan xidhmo ka sameystay, dabadeed anigoo xidhmadii gacanta ku sita, anigoo naf iyo nolol kala dhex jooga, ayaan jaranjarada ugu tagay qolki ninka.

Waxaan filayaa inaan jaranjarada taagnaa saacad dhan.

Markii aan albaabkiisa furay, ayuu qayliyay isla markii uu i arkay. Wuxuu mooday inaan ruux dhintay ahay. Wuxuuna si degdeg ah ugu cararay inuu biyo ii keeno, waayo si toos ah uma taagnaan karayn.

Wadnahaygu si xad dhaaf ah ayuu u garaacayay ilaa madaxaygu xanuunay, mana aanan garanayn waxaan samaynayay.

Markii aan xoogaa soo miyirsaday. Waxaan marka hore xidhmadii dharkayga sariirtiisa dul dhigay, dabadeedna agteeda ayaan fariistay, wejigaygana gacmaha ayaan ku qariyay. Waxaana bilaabay inaan si aan kala go' lahayn u ooyo.

Waxaan filayaa inuu markiiba wax walba fahmay; si murugo leh ayuu ii eegay, taasina qalbigayga ayay laba u kala jeexday.

“Bal i maqal,” ayuu hadalkii ku bilaabay. “I maqal, Nastenka. Waxba ma qaban karo; waxaan ahay nin sabool ah, waxna ma haysto. Xataa meel wanaagsan oo aan ku hoydo ma haysto. Sideen u wada noolaan karnaa haddii aan ku guursado?”

“wakhti dheer ayaannu wada hadalnay; laakiin ugu dambayntii waxaan noqday qof quus iyo waalli ku dhow. Waxaan idhi ma rabo inaan ayeeyday la sii noolaado; waxaan idhi waan ka carari doonaa, ma doonayo in mar dambe dharkayga iyo maradeed la isku xidho, iyo inaan Moscow tagi doono haddii uu iga aqbalo, waayo isaga la’aantiis ma noolaan karo.

Ceeb, kibir/qab iyo jacayl ayaa dhammaantood isku mar gudaha igaga qaylinayay. Waxaana sariirta isku dul tuuray anigoo gariiraya, cabsi aad u weynna ka qaba inuu i diido.

Daqiiqado ayuu aamusnaan ku fadhiyay. wuuna kacay, dabadeedna ii yimid, gacantaydana qabtay.

“I maqal, Nastenkadeyda qaaliga ah ee wanaagsan, i maqal. Waxaan ku dhaaranayaa in haddii aan mar uun awoodi karo inaan guursado, adiga aaad farxaddayda noqon doontid. Waxaan kuu xaqiijinayaa in hadda aad tahay qofka keliya ee iga dhigi kara nin faraxsan.

I maqal. Waxaan u socdaalayaa Moscow. Waxaana halkaas joogi doonaa sannad dhan; waxaan rajaynayaa inaan nolosheyda iyo xaaladdayda halkaas ku dhiso. Markaan soo laabto, haddii aad weli i jeceshahay. Waxaan ku dhaaranayaa inaan farxad wada heli doonno.

Hadda arrintu suurtagal ma aha; awood uma lihi, xaqna uma lihi inaan wax ballanqaad ah ku siiyo.

Haddaba, mar kale ayaan kuu sheegayaa: haddii aysan sannad gudihiis suurtagelin, hubaal mar uun way suurtageli doontaa; taasina, dabcan, waxay ku xiran tahay inaadan qof kale iga doorbidin, waayo ma awoodo, mana dhiirran karo inaan ballan nooc kasta ah kugu xidho.”

Sidaas ayuu ila hadlay, maalintii xigtayna wuu baxay.

Waxaannu isla garannay inaan ayeeyday waxba uga sheegin arrintaas; taasina waxay ahayd rabitaankiisa.

Haddaba, sheekadaydu waxay ku dhowdahay inay dhammaato.

Sannadkii oo dhan wuu dhaafay. Wuu yimid; saddex maalmood ayuu halkan joogay, wuuna..."

"Ee maxaa dhacay?" ayaan ku qayliyay, anigoo aan sabir u hayn inaan dhammaadka maqlo.

"ilaa hadda bidhaantisa ma arag!" ayay Nastenka ku jawaabtay, iyadoo aad mooddo inay dhammaan geesinimadeedii isku soo ururisay. "Wax raad ah iyo wax war ah midna kama hayo."

Halkaas ayay hadalkii ku hakisay. Daqiiqad ayay aamustay, madaxeedana hoos ayay u dhigtay, dabadeed wejigeeda ayay labada gacmood ku saartay, waxayna bilowday inay si aad ah u ooydo, oohinteeduna qalbigayga ayay xanuun ku abuurtay.

Anigu haba yaraatee ma aanan filayn in sheekadu sidan ku dhammaan doonto.

"Nastenka," ayaan si xishood leh ugu bilaabay, cod dabacsan oo aan ku dejinayo, "Nastenka! Ilaahay dartii ha ooyin! Sidee ku ogaatay? Waxaa laga yaabaa inuusan weli iman..."

"Wuu yimid, wuu yimid," ayay Nastenka ku celcelisay. "Halkan ayuu joogaa, waana hubaa.

"Waagaas, fiidkii uu naga tegayay, ayaan arrintan isla garannay. Markii aanu wax kasta oo aan kuu sheegay ka wada hadalnay oo aanu go'aan isla gaarnay, ayaannu bannaanka u soo baxnay oo ku soo lugeynay jiinkan webiga.

Waxay ahayd tobankii habeenimo; kursigan ayaannu ku fadhiisannay. Markaas ma aanan ooyayn; waxa ahmiyad ii lahaa oo aad iila macaanaa inaan maqlo hadalladiisa...

Wuxuuna ii sheegay inuu isla markiiba noo iman doono marka uu soo laabto; haddii aanan aniguna ka diidin, markaas ayaan ku

balanay in ayeeyday wax walba uga sheegi doonno marku soo laabto.

Haddaba, hadda halkan ayuu joogaa, waan ogahay, haddana ima soo booqanayo!"

Mar kale ayay oohin la dhacday.

"Allow yaa Rabbiyoow! Miyaan waxba ka qaban karin murugadaada?" ayaan ku qayliyay anigoo kursigii si quus ah uga soo booday. "Ii sheeg, Nastenka, miyaanay suurtagal ahayn inaan anigu u tago?"

"Taasi ma suurtagal baa?" ayay si kedis ah ii waydiisay, iyadoo madaxeeda kor u qaadday.

"Maya, dabcan ma aha," ayaan idhi anigoo hadalkaygii dib u miisaamaya. "Laakiin bal tan ka warran: warqad u qor."

"Maya, taasi suurtagal ma aha, ma samayn karo," ayay si go'aan adag leh igu jawaabtay, iyadoo madaxeeda hoos u foorarisay oo aanay i soo eegin.

"Sidee bay u noqon wayday? Maxaa ka dhigay wax aan suurtagal ahayn?" ayaan sii raaciyay, anigoo fikraddaydii ku dheggan.

"Laakiin, Nastenka, waxay ku xidhan tahay nooca warqadda aad qorto; warqaduhu isku mid ma aha, mid walbana..."

"Ah, Nastenka, waan hubaa inaan saxanahay. I aamin, i aamin; talo xun kuuma sheegayo. Wax walba si wanaagsan baa loo habayn karaa! Adigu tallaabadii ugu horraysay waad qaadday—maxaa hadda kuu diidaya?"

"Ma awoodo. Ma awoodo! Waxay ila tahay inay noqonayso inaan naftayda ku khasbayo isaga..."

"Ah, Nastenkadayda yar ee wanaagsan," ayaan idhi, anigoo si dhib leh u qarinaya dhoolla-caddayn. "Maya, maya, xaq baad u leedahay inaad sidaas samayso. Runtii xaq baad u leedahay, waayo isagaa ballan kuu qaaday.

"Intaa waxaa dheer, wax kasta oo aad ii sheegtay waxaan ka fahmay inuu yahay nin qalbi jilicsan oo dareen leh; si wanaagsan

buu kuu la dhaqmay," ayaan sii waday, anigoo sii dhex galaya xoogga dooddayda iyo sida aan anigu ugu qanacsanaa.

"Sidee buu kuu la dhaqmay? Ballan buu isku xidhay: wuxuu yidhi haddii uu weligiis guursado, cid aan adiga ahayn ma guursanayo; isla markaasna xorriyad buuxda ayuu kuu siiyay inaad markiiba diidi karto.

"Xaaladdan oo kale, adiga ayaa xaq u leh inaad tallaabada ugu horraysa qaaddo; xaq baad u leedahay. Adigu waxaad joogtaa dabaqad sare oo kuu oggolaanaysa taas—haddii, tusaale ahaan, aad doonayso inaad isaga ka xorayso ballantii uu kuu qaaday..."

"Bal i dhegayso; sidee baad u qori lahayd?"

"Maxaan qori lahaa?"

"Warqaddan."

"Waxaan kuu sheegayaa sida aan anigu u qori lahaa:'Mudanaha sharafta leh..."'

"Runtii ma sidaas ayaan ku bilaabayaa,'Mudanaha sharafta leh'?"

"Dabcan waa inaad sidaas ku bilowdaa! Inkastoo, haddana... ma garanayo; sidaan u malaynayo..."

"Haye, haye, maxaa xiga?"

"'Mudanaha sharafta leh—waxaan kaa raalli-gelinayaa...' Laakiin maya, raalli-gelin looma baahna; xaqiiqada jirta lafteedu wax walba bay cudurdaar u tahay. Si fudud u qor:—"

"Waxaan kuu soo qorayaa warqaddan. Iga raalli noqo degdegayga; sannad dhan ayaan rajo ku noolaa—miyaan markaa eed ku leeyahay inaan maanta hal maalin oo shaki ah u adkaysan kari waayo? Hadda oo aad timid. Waxaa laga yaabaa inaad fikirkaaga beddeshay. Haddii ay sidaas tahay, warqaddani waxay kuu sheegaysaa inaanan ka murugoonayn, mana ku eedaynayo. Kuma eedaynayo, waayo qalbigaaga awood kuma lihi; nasiibkayguna sidaas buu noqday!

"Waxaad tahay nin sharaf leh. Ma ku qosli doontid, mana ka xanaaqi doontid erayadan degdegga ah. Xusuuso in ay qortay gabar sabool ah; gabar keligeed ah; aan haysan cid talo siisa, cid jidka tusisa, oo aan iyaduna awood u lahayn inay qalbigeeda maamusho. Laakiin iga raalli noqo in shaki uu qalbigayga ku soo dhacay—xataa haddii uu hal ilbiriqsi oo keliya ahaa. Adigu ma tihid nin awood u leh inuu aflagaaddeeyo. Xataa fikir ahaan, gabadhii sidaas kuu jeclayd ee welina sidaas kuu jecel."

"Haa, haa; sidaas oo kale ayaan aniguna u fikirayay!" ayay Nastenka qaylisay, indhaheeduna farxad bay la ifeen. "Alla, dhibaatadii oo dhan waad ii xallisay! Ilaahay baa ii kaa soo diray! Mahadsanid, mahadsanid!"

"Maxaad igu mahadcelinaysaa? Maxaad igu mahadcelinaysaa? In Ilaahay ii soo diray miyaa?" ayaan ku idhi, anigoo farxad ka muujinaya wejigeeda yar ee farxadda la ifaya.

"Haa, taasna sidoo kale."

"Ha, Nastenka! Dadka qaar waxaa looga mahadceliyaa inay dunidan kula noolyihiin, aniguna waxaan kaaga mahadcelinayaa inaan ku bartay—inaan awood u yeesho inaan xusuustaada nolosheyda oo dhan sitto."

"Haye, intaas inoogu jooji! Laakiin bal hadda tan dhegayso: waagaas waxaannu isla garannay in marka uu yimaaddo uu si uun ii soo ogeysiin doono—ama uu warqad uga tagi doono dad wanaagsan oo aan aqaan, kuwaas oo aan arrintan waxba ka ogeyn, iyaguna ay warqadda u sii gudbin doonaan isaga; ama, haddii ay suurtagal noqon weydo inuu warqad ii soo diro, waayo warqad waliba wax walba ma gudbiso, inuu maalinta uu yimaaddo tobanka habeenimo halkan iman doono, meesha aynu ku ballannay.

"Waan ogahay inuu yimid; laakiin hadda waa maalintii saddexaad, wax raad ahna ma jiro, warqadna ma jirto. Subaxdii suuragal iima aha inaan ayeeyday ka soo fogaado. Sidaa darteed, berri warqaddayda u gee dadkii wanaagsanaa ee aan kuu sheegay;

iyagaa isaga u sii gudbin doona. Haddii uu jawaab soo diro, berri tobanka habeenimo ii keen."

"Laakiin warqadda, warqadda! Waad arkaysaa, marka hore waa inaad warqadda qortaa! Sidaas darteed. Waxaa laga yaabaa inay noqoto maalinta ku xigta berri."

"Warqadda..." ayay Nastenka tidhi iyadoo yara wareersan. "Warqadda... laakiin..."

Hadalkeedii ma ay dhammaystirin. Markii hore wejigeedii yaraa ayay dhinac iga jeedisay, isagoo casaaday sidii ubax. Dabadeed, si kedis ah ayaan gacantayda ugu dareemay warqad—warqad hore loo qoray, oo diyaar ahayd, bashqad lagu xidhay.

Xusuus macaan oo soo jiidasho leh, oo aan si fiican u aqaanay, ayaa markiiba maskaxdayda dul sabaysay.

"R, o—Ro; s, i—si; n, a—na," ayaan bilaabay inaan xaraf xaraf u akhriyo.

"Rosina!" ayaannu labadeenuba isku mar ku dhawaaqnay; aniguna farxad awgeed waxaan ku sigtay inaan laabta galiyo, iyaduna waxay la gaduudatay xishood awgeed, iyadoo qosol la ilmaynaysa; ilmadii indhaheeda ku dheggenaydna waxay u dhalaalayeen sidii luul ku dul yaal baalasha indhaheeda madow.

"Haye, bas halkaas haku eekaato! Hadda nabadgelyo," ayay si degdeg ah u tidhi. "Warqaddii waa tan, cinwaankii aad geyn lahaydna waa kan. Nabadgelyo, ilaa aynu mar kale kulmayno! Ilaa berri!"

Labada gacmoodba si diirran ayay ii qabatay, madaxeedana way ii ruxday, dabadeedna sidii fallaadh ayay ugu duushay jidkeedii yarraa.

Aniguna muddo dheer ayaan halkii taagnaa, indhahayguna daba socdeen ilaa ay aragayga ka sii fogaatey.

"Ilaa berri! Ilaa berri!" in badan ayay erayadaasi dhegahayga ka dhex guuxayeen, iyadoo indhahayga hortooda ka sii fogaatay.

HABEENKII SADDEXAAD

Maanta waxay ahayd maalin murugo leh oo roob da'ayo, iyadoo aanay xataa ilays yar oo qorrax ahi muuqan—sida cimrigii gabowga ahaa ee hortayda yaallay.

Waxaan dareemayaa culays ay igu reebayaan fikirro yaab leh iyo dareenno mugdi ah; su'aalo weli iga qarsoon oo aanan jawaabtooda garanayn ayaa maskaxdayda isku soo ururay, mana u maleynayo inaan leeyahay awood ama rabitaan aan ku kala caddeeyo. Arrimahaas oo dhan aniga la igama rabo inaan xalliyo!

Maanta isma arki doonno.

Shalay, markii aannu is macasalaamaynaynay, daruurihii ayaa cirka isku soo ururiyay, ceeryaamo ayaa dhulka ka soo kacday. Waxaan idhi, "Berrito maalin xun bay noqon doontaa." Iyaduna wax jawaab ah ima siin; ma doonayn inay hadalkayga ku baajiso rajadeeda. Waayo iyada, maalintaasi waxay u ahayd maalin ifaysa oo cad; mana jirin daruur keliya oo loo oggolaan karo inay madoobayso farxaddeeda.

"Haddii roob da'o, isma arki doonno," ayay tidhi. "Ma iman doono."

Waxaan moodayay in roobka maanta da'aya aanu iyada waxba u dhimayn, haddana ma iman.

Shalay waxay ahayd kulankeennii saddexaad—habeenkeennii saddexaad ee caddada…

Laakiin farxad iyo raynrayn qofka sidee bay u qurxiyaan! Qalbigu sidee buu jacayl uga buuxsamaa! Qofku wuxuu doonayaa inuu wixi galgacal ah ee qalbigiisa ku jira oo dhan inuu bannaanka u soo saaro; wuxuu rabaa in wax walba farxad noqdaan, wax walbana farxad la xidhidhaan. Farxadduna sidee bay u faaftaa!

Shalay hadalladeeda waxaa ka buuxay dabacsanaan, qalbigeedana waxay igu haysay dareen naxariis iyo kalgacal. Siday ii

danaynaysay, siday saaxiibtinimo igu soo dhawaanaysay; siday si naxariis leh isugu dayaysay inay i dhiirrigeliso! Alla, farxaddu sidee bay qofka u so jiidataa!

Aniguna... waxaas oo dhan waxaan u qaatay inay dhab yihiin. Waxaan moodayay inay iyadu... Laakiin, Ilaahayow, sideen sidaas ugu malayn karay? Sideen u noqon karay qof sidaas u indho la', iyadoo qalbigeedu mar hore qof kale qaatay, iyadoo aan waxba anigu ku helayn?

Runtii. Xataa naxariisteeda ay ii muujinaysay, welwelkeeda, kalgaceylkeeda... haa. Xataa jacaylkeeda ay ii hayso, miyaanay ahayn wax kale oo aan ka ahayn farxadda ay u qabtay inay dhowaan arki doonto ninka kale, iyo rabitaanka ay u qabtay inay anigana qayb iga dhigto farxaddeeda?

Markii uusan iman, markii aannu sugitaankeennii micne la'aanta ahaa ku sii jirnay, wejiga aya madoobaaday, xishood iyo niyad-jabna waa ka muuqday. Dhaqdhaqaaqyadeedii iyo hadalladeedii mar dambe ma ahayn sidii hore—ma ahayn kuwo fudud, ciyaar iyo farxad ka buuxdo.

Haddana, yaab bay ahayd, waxay si ka sii badan ii muujisay daryeel iyo galgacal, sidii iyadoo si dabiici ah u doonaysa inay aniga igu badasho wax kasta oo ay nafteedu sida weyn u jeclayd inay hesho, haddii rabitaankeedii rumoobi waayo.

Nastenkadaydii waxay noqotay mid sidaas u murugaysan, sidaasna u niyad-jabsan, oo waxaan filayaa inay ugu dambayntii garatay inaan jeclahay, ayna u damqatay jacaylkayga liita.

Marka aynu murugaysannahay, waxaynu si ka sii qoto dheer u dareemnaa murugada dadka kale; dareenku ma baaba'o, ee wuu sii ururaa oo xoogaystaa...

Waxaan ugu imid qalbi farxad ka buuxdo, anigoo samir la'aan u xiisaynaya inaan arko. Marnaba ma aanan sii odorosin inaan sidaan hadda dareemayo dareemi doono, mana aanan filayn in sheekadu farxad ku dhammaan doonto.

Iyadu farxad bay la ifaysay; jawaab ayay sugaysay. Jawaabta ay sugaysayna isaga laftiisa ayay ahayd. Wuu iman lahaa, markii ay u yeertana u soo ordi lahaa.

Iyadu saacad dhan ayay iga soo horreysay. Bilowgii wax kasta way ku qosli jirtay, hadal kasta oo aan dhahana qosol ayay ka daba keeni jirtay. Aniguna hadal baan bilaabay, laakiin wax yar ka dib waan aamusay.

"Ma ogtahay sababta aan maanta sidaas ugu faraxsanahay," ayay tidhi, "sababta aan kuugu faraxsanahay inaan ku arko—iyo sababta aan maanta si gaar ah kuu jeclahay?"

"Maxay tahay?" ayaan waydiiyay, wadnahayguna wuxu bilaabay inuu si xoog leh u garaaco.

"Waan kaa helay sababtoo ah ima aadan jeclaan. Waad ogtahay, ragga qaar oo kula midka ah way i dhibi lahaayeen, way i daba socon lahaayeen, iyagoo calaacalaya oo murugaysan; adiguse waad ka duwan tahay, waanad ka fiican tahay!"

Dabadeed gacantayda ayay si xoog ah u cadaadisay, ilaa aan ku sigtay inaan xanuunka la qayliyo.

Iyaduna way qososhay.

Ugu dambayntii qalbigaygu wuu buuxsamay, mana sii qarin karin.

"Dhagayso, Nastenka!" ayaan ku dhawaaqay. "Ma ogtahay sida ay maanta oo dhan xaaladdaydu ahayd?"

"Maxay ahayd? Sidee? Sidee bay ahayd? Dhaqso ii sheeg! Maxaad intaas oo dhan waxba iigu sheegi wayday?"

"Bilowgii, Nastenka, markii aan dhammeeyay dhammaan wixii aad ii xilsaartay, warqaddii geeyay, oo aan u tagay saaxiibbaddaa, dabadeed... dabadeed gurigaygii ayaan ku noqday oo sariirta ayaan seexday."

"Intaas oo keliya miyaa?" ayay hadalkii iga dhex gashay iyadoo qoslaysa.

“Haa, ku dhowaad intaas oo keliya,” ayaan ugu jawaabay anigoo iscelinaya, waayo illin aanan rabin ayaa durba indhahayga ka soo daatatay.

“Hal saac ka hor ballanteennii ayaan soo toosay, haddana waxay ila ahayd inaanan haba yaraatee seexan. Ma garanayo waxa igu dhacay. Waxaan halkan u imid inaan wax walba kuu sheego, anigoo dareemaya sidii in waqtigu uu istaagay; sidii hal dareen, hal shucuur, ay tahay inay weligeed ila sii joogi doonto; sidii hal daqiiqad ay weligeed sii soconayso, noloshiina ay aniga iiga istaagtay...

“Markii aan soo toosay, waxay ila ahayd in laxan muusig oo aan muddo dheer aqaanay, meel hore uga maqlay, dabadeedna illoobay—laakiin ahaa mid si aan caadi ahayn oo u macaan—oo ann hadda dib u maqlay. Waxay ila ahayd in laxankaasi nolosheyda oo dhan qalbigayga garaacayay, balse hadda uun...”

“Alla yaa Rabbi, yaa Rabbi,” ayay Nastenka hadalkii iga dhex gashay, “maxay waxaas oo dhan ka dhigan yihiin? Hal eray kama fahmin.”

“Ah, Nastenka. Waxaan rabay uun inaan kuu soo gudbiyo dareenkaas yaabka leh...” ayaan ku bilaabay cod murugo leh, cod weli ay ku qarsoonayd rajo, inkastoo ay aad u yarayd.

“Jooji. Aamus!” ayay tidhi, hal ilbiriqsi gudihiina gabadha caqliga iyo xeeladda badan waxay markiiba garatay waxa aan ula jeeday.

Si kedis ah ayay u noqotay qof hadal badan, farxad badan oo kaftan iyo ciyaar ka buuxdo; gacantayda ayay qabsatay, way qososhay, waxayna doonaysay inaan aniguna qoslo, eray kasta oo isku dhex yaacsan oo afkayga ka soo baxana waxay uga jawaabaysay qosol dheer oo macaan.

Waxaan bilaabay inaan xanaaqo; si kedis ah ayay u bilowday inay i shukaansato.

“Ma ogtahay,” ayay hadalkeeda ku bilaawday, “wax yar ayaan ka xumaaday inaad i jeclaan wayday Runtii, dabeecadda aadanaha

waxba lagama fahmi karo! Laakiin si kastaba ha ahaatee, ninka isla weyn, iguma eedayn kartid inaan sidaan u fududahay; wax kasta ayaan kuu sheegaa, wax kasta—xataa fikir kasta oo nacasnimo ah oo maskaxdayda ku soo dhaca."

"Dhagayso! Waxay ila tahay inay kow iyo toban saac tahay," ayaan idhi, iyadoo dhawaaqa gaabiska ah ee gambaleel ka imanaya munaarad fog dhagta la raacaysa.

Si kedis ah ayay u aamustay, qosolkii way joojisay, waxayna bilowday inay tiriso garaacyada gambaleelka.

"Haa, waa kow iyo toban saac," ayay ugu dambayntii tidhi, iyadoo codkeedu yahay mid xishood leh oo aan hubanti lahayn.

Isla markiiba waan ka qoomameeyay inaan cabsi geliyay oo aan ku qasbay inay garaacyada tiriso. Waxaanan naftayda ku nacay damacii xumaa ee iga soo baxay; waan u damqaday, mana garanayn sida aan u sixi lahaa wixii aan sameeyay.

Waxaan bilaabay inaan qalbigeeda dejiyo, anigoo raadinaya sababo an ku qanciyo sababta uu ninki u iman waayay, oo u soo bandhigaya dooddo iyo caddaymo kala duwan.

Xilligaas, qof ka fudud in la qanciyo lama heli karin oo iyada oo kale; run ahaantiina, qof kasta marka uu xaaladdaas oo kale ku jiro. Wuxuu si farxad leh u dhegaystaa odhaahyo niyad dhis kasta oo loo sheego, wax kasta oo ay tahay. Wuxuuna ku farxaa xataa haddii cudurdaar yar oo run u eg loo heli karo.

"Runtii, arrintu waa wax aan macquul ahayn," ayaan hadalkaygii ku bilaabay, anigoo hawshaas ku sii dhiirranaya, isla markaana aad ula dhacay sida dooddaydu u kala caddayd. "Bal eeg, ma uusan iman karin. Adiga ayaa hadallada iga qasay oo i wareeriyay, Nastenka, ilaa aniguna waqtigii aan ilaaway... Bal ka fikir: warqaddaada waxaa laga yaabaa inuusan weli helin. Ka soo qaad inuusan awoodin inuu yimaado; ka soo qaad inuu warqadda kaaga jawaabayo—markaas ma iman karo ilaa berri. Berri marka waagu baryo ayaan u tegi doonaa, isla markiiba waan kuu soo sheegi doonaa. Bal eeg,

kumannaan arrimood ayaa dhici kara; waxaa laga yaabaa inuusan guriga joogin markii warqaddu timid, oo laga yaabaa inuusan weli akhrin! Wax walba way dhici karaan, waad ogtahay."

"Haa, haa!" ayay Nastenka tidhi. "Arrintaas kama aanan fikirin. Dabcan, wax walba way dhici karaan," ayay sii raacisay, codkeeduna wuxuu ahaa mid aan dood ka keenayn hadalkayga, inkastoo ay dhexdiisa ka yeedhayeen fikrado kale oo meel fog ku imaanaya, sida cod qaraar oo dhibsanaya.

"Waxaan kuu sheegayaa waxa aad samaynayso," ayay tidhi. "Berri subax sida ugu horreysa u tag, haddii aad wax war ah soo hesho, isla markiiba ii soo sheeg. Waad taqaannaa meesha aan degganahay, miyaanay ahayn?"

Dabadeed waxay bilowday inay ii sheegto cinwaankeeda, iyadoo dib ii xusuusinaysa meesha ay deggan tahay.

Markaas ayay si kedis ah iigu noqotay mid aad u debecsan, aadna ii danaynaysa. Waxay si taxaddar leh u dhegaysanaysay wax kasta oo aan u sheegayay; laakiin marka aan su'aal waydiiyo, way aamusaysay, way wareeri jirtay, dabadeedna madaxeeda ayay dhinac u jeedisay.

Indhaheeda ayaan eegay—haa, way ooyaysay.

"Sidee baad sidaas u yeeli kartaa? Sidee? Alla, ilmo yar baad tahay! Carruurnimo weeye tani!... Kaalay, kaalay!"

Waxay isku dayday inay dhoolla-caddayso oo is dejiso, laakiin garkeeda ayaa gariirayay, laabteeduna weli si xoog leh ayay u kacaysay oo u degaysay.

"Adiga ayaan ka fikirayay," ayay daqiiqad aamusnaan ah ka dib tidhi. "Aad baad u naxariis badan tahay; haddii aanan taas dareemi lahayn. Waxaan ahaan lahaa dhagax. Ma garanaysaa waxa hadda maskaxdayda ku soo dhacay? Labadiinna ayaan is barbar dhigayay. Maxaa isaga ka dhigi waayay sidaada oo kale? Maxuu kuugu ekaan waayay? Isagu adiga kaama fiicna, inkastoo aan isaga kaa jeclahay."

Wax jawaab ah kama aanan bixin. Waxay moodaysay inaan wax odhan doono.

"Dabcan. Waxaa laga yaabaa inaanan weli si buuxda u fahmin," ayay sii tidhi. "Waad ogtahay, mar walba isaga ayaan ka baqi jiray; had iyo jeer wuxuu ahaa mid aad u culus, aad mooddo inuu isla weyn yahay. Dabcan waan ogahay inay sidaas oo keliya ii muuqato; waan ogahay in qalbigiisa ay ku jirto naxariis ka badan tan qalbigayga ku jirta... Waxaan xusuustaa sida uu ii eegay markii aan qolkiisa u galay—ma xusuusataa?—anigoo xidhmadii dharkayga sita. Hase yeeshee, weli aad baan u ixtiraamaa; miyaanay taasi caddaynayn inaanan innagu sinnayn?"

"Maya, Nastenka, maya," ayaan ugu jawaabay. "Taasi waxay caddaynaysaa oo keliya inaad isaga ka jeceshahay wax kasta oo dunidan yaal, oo aad naftaada uga jeceshahay si ka badan."

"Haa, bal haddii ay sidaas tahay," ayay Nastenka si aano-la'aan ah ugu jawaabtay. "Laakiin ma garanaysaa waxa hadda igu soo dhacay? Hadda isaga kama hadlayo ee guud ahaan ayaan ka hadlayaa; arrintani waxay maskaxdayda ku soo dhacday waqti hore. Ii sheeg, maxaynu dhammaanteen walaalo oo kale isugu noqon kari waynay? Maxay tahay sababta xataa dadka ugu wanaagsan ay mar walba ugu muuqdaan inay wax dadka kale ka qarinayaan, oo ay waxa qalbigooda ku jira dib ugu haystaan?

"Maxaynu si toos ah u sheegi waynay waxa qalbigeenna ku jira, marka aynu ognahay inaanan hadal aan micne lahayn ku hadlayn? Sida ay wax yihiin, qof kastaa wuxuu u muuqdaa inuu ka qallafsan yahay sida uu dhab ahaan yahay, sidii iyadoo qof kastaa ka baqayo inuu dareenkiisa dulmiyo ama xaqdarro u geysto, haddii uu si degdeg ah u muujiyo."

"Ha, Nastenka, waxa aad leedahay waa run; laakiin waxaa jira sababo badan oo sidaas keenaya," ayaan hadalka ka dhex galay, anigoo xilligaas si ka sii badan sidii hore u qarinaya dareenkayga.

"Maya, maya!" ayay si qoto dheer oo dareen leh ugu jawaabtay. "Adiga, tusaale ahaan, dadka kale la mid ma tihid! Runtii ma garanayo sida aan kuugu sheego waxa aan dareemayo; laakiin waxay ila tahay in adiga, tusaale ahaan... hadda... aad wax ii hurayso/tanaasulayso" ayay si xishood leh ugu dartay, iyadoo daymo igu xadaysa.

"Iga raalli noqo inaan sidaas ku idhaahdo; waad ogtahay inaan ahay gabar yar. Wax badan nolosha kama aanan arag, mararka qaarkoodna runtii ma garanayo sida aan wax u iraahdo," ayay ku dartay cod gariiraya oo ay ku qarsoonayd dareen xooggan, iyadoo isku dayaysa inay dhoolla-caddayso. "Laakiin waxaan rabay oo keliya inaan kuu sheego inaan kuu mahadcelinayo, oo aan wax walba dareemayo... Alla, Ilaahay ha ku siiyo farxad intaas oo dhan darteed! Wixii aad ii sheegtay ee ku saabsanaa ninkaaga riyoo ku noolaha aha hadda run ma aha—taas waxaan ula jeedaa, adiga kuguma habboona.

"Waad soo kabanaysaa; waxaad noqotay nin gebi ahaan ka duwan kii aad naftaada ku sifaysay. Haddii aad mar uun qof jeclaato, Ilaahay ha ku siiyo farxad aad iyada la wadaagto! Anigu iyada waxba uma rajaynayo, waayo adiga ayay kula farxi doontaa. Waan ogahay; aniguba naag baan ahay, sidaas darteed waa inaad i rumaysataa markaan sidaas kuu leeyahay."

Hadalkeedii ayay joojisay, gacantaydana si diirran ayay u cadaadisay.

Aniguna dareen dartii ma aanan hadli karin.

Daqiiqado ayaa sidaas ku dhaafay.

"Haa, way caddahay inuusan caawa imanayn," ayay ugu dambayntii tidhi iyadoo madaxeeda kor u qaadday. "Waa goor dambe."

"Berri ayuu iman doonaa," ayaan ugu jawaabay cod aad u adag oo kalsooni iyo qancin ka buuxdo.

“Haa,” ayay tidhi, iyadoo aanay ka muuqan wax raad ah oo ku saabsan niyad-jabkii hore. “Hadda aniguba waan garanayaa inuusan berri ka hor iman karin. Haye, nabadgelyo, ilaa berri. Haddii roobku da’o. Waxaa laga yaabaa inaanan iman. Laakiin maalinta ku xigta berri waan imanayaa. Hubaal waan imanayaa, wax kasta oo dhaca ha dhaceene; halkan imaw. Waxaan rabaa inaan ku arko, wax walbana waan kuu sheegi doonaa.”

Markii aannu kala tagaynayna, gacanteeda ayay ii soo dhiibtay, iyadoo si daacad ah indhaha ii eegaysa, waxayna tidhi:

“Mar walba waynu wada joogi doonnaa, miyaanay ahayn?”

“Alla, Nastenka, Nastenka! Haddaad ogaan lahayd sida aan hadda u kelinimo u dareemayo!”

Isla markii saacaddu sagaalka garaacday, gudaha guriga sii joogi kari waayay. Dharkaygii ayaan xidhtay, dabadeedna bannaanka ayaan u baxay, inkastoo cimiladu xumayd.

Halkii ayaan tagay, kursigeennii ayaan fariistay.

Waddadooda ayaan u kacay, laakiin waan xishooday; markii aan laba tallaabo oo keliya u jiray albaabkooda ayaan dib u soo noqday, anigoon xataa daaqadooda eegin.

Gurigii ayaan ku noqday anigoo ka niyad-jabsan si ka daran sidii aan weligayba hore u ahaan jiray.

Maalin qoyan oo murugo iyo caajis badan bay ahayd! Haddii cimiladu wanaagsanaan lahayd, habeenka oo dhan waan iska socon lahaa...

Laakiin berri, berri!

Berri ayay wax walba ii sheegi doontaa.

Warqaddiise maanta ma iman. Laakiin taas waa la filayay.

Hadda waa inay iyaga labadoodu wada joogaan...

HABEENKII AFRAAD

Ilaahayow, sidee bay wax walba ku dhammaadeen! Maxayse ku dambeeyeen! Sagaalkii ayaan imid.

Iyadu mar hore ayay joogtay. Meel dheer ayaan ka arkay; sidii habeenkii igu horreysay oo kale ayay u taagnayd, xusulladeedana waxay saartay birta jiinka, mana ay maqlin markii aan xaggeeda u soo dhowaaday.

"Nastenka!" ayaan ugu yeedhay, anigoo xoogaa isku dayaya inaan qariyo xamaasadayda.

Si degdeg ah ayay iigu soo jeesatay.

"Haye?" ayay tidhi. "Haye? ii dhakhso!"

Anigoo yaabban ayaan eegay.

"Haye, warqaddii xaggee bay jirtaa? Warqaddii ma keentay?" ayay ku celisay, iyadoo birtii jiinka si adag u qabsanaysa.

"Maya, wax warqad ah ma jirto," ayaan ugu dambayntii idhi. "Miyuusan weli kuu iman?"

Cabsi ayay la caddaatay, waxayna muddo dheer i eegaysay iyadoo aan dhaqaaqin. Waxaan burburiyay rajadeedii u dambaysay.

"Haddaba, Ilaahay ha la jiro," ayay ugu dambayntii tidhi iyadoo codkeedu naaqusay. "Ilaahay ha la jiro haddii uu sidaas igaga tagayo."

Indhaheeda ayay hoos u dhigtay, dabadeed waxay isku dayday inay I soo fiiriso, laakiin way awoodi wayday. Daqiiqado badan ayay la tacaalaysay dareenkeeda.

Mar qudha ayay iga jeesatay, xusulladeedana ku tiirisay birtii jiinka, waxayna ku dhufatay baroor.

"Ha ooyin, ha ooyin!" ayaan bilaabay inaan idhaahdo; laakiin markaan eegay, awood uma aanan helin inaan hadalka sii wado, mana garanayn waxaan ku odhan lahaa.

“Ha isku dayin inaad i dajiso,” ayay tidhi. “isaga ha igala hadlin; ha ii sheegin inuu iman doono, ama inuu si naxariis-darro iyo bini’aadantinimo-la’aan ah iiga tagay sida uu hadda yeelay. Maxaa keenay—maxaa keenay? Ma warqaddaydii ay wax ka khaldanayeen? Warqaddii nasiib-darrada?”

Halkaas ayay oohintu codkeedii qarisay; qalbigayguna wuu jeexmay intaan iyada eegayay.

“Alla, sidee bay tani u tahay naxariis-darro aan bini’aadannimo lahayn!” ayay mar kale bilowday. “Xataa hal sadar, hal sadar oo keliya ii ma soo qorin! Ugu yaraan wuxuu qori karayay inuusan i rabin, inuu i diiday—laakiin saddex maalmood oo dhan, hal sadar oo keliya ma so dirin! Sidee bay ugu fududahay inuu dhaawaco, inuu liido gabar sabool ah oo aan cidina u hiilin karin, iyadoo dembigeeda keliya uu yahay inay isaga jeclaatay! Alla, waxa aan saddexdan maalmood soo maray! Alla, Rabbiyoow! Markaan ka fikiro inaan anigu uga horreeyay oo u tegay, inaan hortiisa isku dulleeyey, ooyay, oo ka baryay xoogaa jacayl ah!... dabadeedna sidaas!”

“Dhagayso,” ayay tidhi iyadoo xaggayga u soo jeesatay, indhaheedii madoobaa oo holcaya, “sidaas ma aha! Sidaas ma noqon karto; Ama adiga ayaa qaldan ama aniga ayaa qaldan; waxaa laga yaabaa inuusan warqaddii helin? Waxaa laga yaabaa inuusan weli waxba ka ogayn? Sidee bay suurtagal u tahay—adigu naftaada waydii, ii sheeg, Ilaahay dartii ii sharax; anigu ma fahmi karo—sidee qof ugu dhaqmi karaa sida qallafsanaanta iyo bahalnimada ah ee uu aniga ila dhaqmay? Hal eray oo keliya ma aha! Bal ka warran. Xataa makhluuqa ugu liita dhulka ayaa si naxariis badan loola dhaqmaa.

“Waxaa laga yaabaa inuu wax maqlay. Waxaa laga yaabaa in qof wax iiga sheegay aniga,” ayay tidhi iyadoo su’aal walaac leh xaggayga ii soo jeesanaysa. “Adigu maxaad u malaynaysaa?”

“Dhagayso, Nastenka, berri aniga aya dartaa ugu tagaya.”

“Haa?”

"Wax walba ayaan wax ka waydiin doonaa; wax walbana waan u sheegi doonaa."

"Haa, haa?"

"Warqad qor. Ha odhan maya, Nastenka, ha odhan maya! Waxaan ku kallifi doonaa inuu ixtiraamo tallaabada aad qaadday, wax walbana wuu maqli doonaa, haddii—"

"Maya, saaxiibkayow, maya," ayay hadalkaygii iga dhex gashay. "Intaas baa ku filan! Eray kale, sadar kale oo iga yimaadda ma jiri doono—intaas ku filan! Isagu ma garanayo, aniguna mar dambe ma jecli. Waan... illoobi doonaa."

Hadalkeedii way sii wadi kari wayday.

"Is deji, is deji! Halkan fadhiiso, Nastenka," ayaan idhi anigoo kursiga fariisinaya.

"Waan degganahay. Ha welwelin. Waxba ma aha! Waa illin oo keliya, mar dhow way qalali doonaan. Miyaad moodaysaa inaan naftayda wax yeeli doono, ama aan webiga isku tuuri doono?"

Qalbigaygu wuu buuxsamay; waxaan isku dayay inaan hadlo, laakiin waan kari waayay.

"Dhagayso," ayay tidhi iyadoo intay gacantayda qabatay. "Ii sheeg: adigu sidan ma aad samayn lahayd, miyaad Gabar iyada oo iskeed kuugu timid, ma aad ka tegi lahayd sidaas ma wejigeeda ayaad ku tuuri lahayd hadal ceeb iyo yasmo leh oo ku saabsan qalbigeeda jilicsan ee nacasnimada ah? Ma daryeeli lahayd? Ma garan lahayd inay keligeed tahay, inaysan aqoon sida ay nafteeda u daryeesho, inaysan awoodin inay iska ilaaliso inay ku jeclaato, inaysan iyadu eedda lahayn, eedda iyadu lahayn—inaanay waxba samayn... Alla, Ilaahayow, Ilaahayow!"

"Nastenka!" ayaan ugu dambayntii ku dhawaaqay, anigoo aan mar dambe xakamayn karin dareenkayga. "Nastenka, waad i cadaadinaysaa! Qalbigayga ayaad dhaawacaysaa, waad i dilaysaa, Nastenka! Mar dambe ma aamusi karo! Ugu dambayntii waa inaan

hadlaa, waa inaan afka ka soo saaraa waxa qalbigayga ku soo qulqulaya!"

Intaan sidaas dhahay ayaan kursigii ka soo kacay.

Gacantayda ayay qabatay, iyadoo yaabban oo ii eegaysa.

"Maxaa kugu dhacay?" ayay ugu dambayntii tidhi.

"Dhagayso," ayaan si go'aan leh u idhi. "I dhegayso, Nastenka! Waxa aan hadda kuu sheegayo dhammaantood waa wax aan macquul ahayn, wax aan sal iyo raad toona lahayn, wax nacasnimo ah! Waan ogahay in tani weligeed dhici karin, laakiin haddana ma aamusi karo. Dhibaatada aad hadda ku jirto darted. Waxaan kaa baryayaa inaad horay ii cafiso!"

"Maxaa jira? Maxaa jira?" ayay tidhi iyadoo illinta iska tirtiraysa oo si feejigan ii eegaysa; indhaheeda yaabka la taaganina waxaa ka dhex muuqday xiise aan caadi ahayn.

"Maxaa kugu dhacay?"

"Waa wax aan suurtagal ahayn, laakiin waan ku jeclahay, Nastenka! Waa taas! Hadda wax walba waan kuu sheegay," ayaan idhi anigoo gacanta u ruxaya. "Hadda waxaad arki doontaa inaad weli awoodi doonto inaad ila hadasho sidii aad hadda uun ila hadlaysay, iyo inaad dhegaysan karto waxa aan kuu sheegi doono..."

"Haye maxaa kale?" ayay Nastenka hadalkaygii iga dhex gashay. "Maxaa ka jira? Waan ogaa inaad i jeceshahay waqti hore, laakiin mar walba waxaan moodayay inaad iga heshay oo kaliya... Alla, Ilaahayow, Ilaahayow!"

"Bilowgii waxay ahayd oo keliya kalgacal, Nastenka, laakiin hadda, hadda! Waxaan ku jiraa isla xaaladdii aad adigu ku jirtay markii aad isaga ugu tagtay adoo dharkaaga sita. Xataa xaaladdaydu way ka daran tahay taas, Nastenka, waayo isaga ma uusan jeclayn qof kale sida aad adigu isaga u jeceshahay."

"Maxaad ila hadlaysaa sidaas! Waxba kama fahmin waxa aad leedahay. Laakiin ii sheeg, maxay tani ku saabsan tahay; ma aha inaan leeyahay maxay ku saabsan tahay, ee waxaan leeyahay maxaad

sidaas kedis ugu... Alla, hadal aan waxba ka jirin ayaan ku hadlayaa! Laakiin adigu..."

Nastenka hadalkii way goysay iyadoo wareersan. Dhabannadeedu way gaduuteen; indhaheedana hoos ayay u dhigtay.

"Maxaan sameeyaa, Nastenka, maxaan sameeyaa? Anigaa khaldan. Waan kugu xadgudbay... Laakiin maya, maya, anigu ma khaldani, Nastenka; taas waan dareemayaa, waan ogahay, waayo qalbigaygu wuxuu ii sheegayaa inaan saxanahay, maxaa yeelay sinaba kuu dhaawici kari maayo, ma dhaawici karo qalbigaaga! Waxaan ahaa saaxiibkaa, welina saaxiibkaa ayaan ahay, kalsoonidii aad ii dhiibatayna ma aanan khiyaamin. Bal eeg, Nastenka, ilmadu way iga qubanaysaa. Ha qubato, ha qubato—cidna waxba uma dhimayso. Way qalali doontaa, Nastenka."

"Fadhiiso, fadhiiso," ayay tidhi iyadoo igu fariisinaysa kursiga.

"Alla, Ilaahayow!"

"Maya, Nastenka, ma fadhiisanayo; halkan mar dambe sii joogi kari maayo, mar dambena ima arki doontid. Wax walba ayaan kuu sheegayaa dabadeed waan tegayaa. Waxa keliya ee aan doonayo inaan kuu sheego waa inaadan waligaa ogaan lahayn inaan ku jeclaa. Sirteyda waan qarsan lahaa. Xilligan oo kale kuma dhibi lahayn anigoo danaysi ku kacaya. Maya! Laakiin hadda isma celin karin; adiga qudhaada ayaa arrintaas ka hadashay, adigaa sabab u ah, adiga ayaa khaladka leh ee anigu ma lihi. Iga fogayn kari maysid naftaada..."

"Maya, maya, kaama fogaynayo, maya!" ayay tidhi Nastenka, iyadoo intii karaankeeda ah qarinaysa wareerkeeda, miskiinta yar.

"Kaama fogaynayo? Maya! Laakiin waxaan ula jeeday inaan anigu kaa cararo. Waan tegayaa, laakiin marka hore wax walba ayaan kuu sheegayaa. Waayo markii aad halkan ku ooyaysay, ma aanan awoodin inaan iska fadhiisto anigoo aan waxba dareemayn. Markii aad ooyaysay, markii aad la ildarnayd xanuunka ah in lagu... in

lagu—waan ka hadli doonaa, Nastenka—lagu dayacay, jacaylkaagana la diiday. Waxaan qalbigayga ka dareemay inaan kuu hayo jacayl aad u badan, Nastenka, jacayl aad u badan! Waxayna ii ahayd wax aad u qadhaadh inaanan jacaylkayga kugu caawin karin; qalbigayguna wuu dillaacayay, aniguna... anigu ma aamusi karin, waa inaan hadlaa, Nastenka, waa inaan hadlaa!"

"Haa, haa! Ii sheeg, ila hadal," ayay tidhi Nastenka iyadoo samaynaysa dhaqdhaqaaq aan si fudud loo qeexi karin. "Waxaa laga yaabaa inaad la yaabto inaan sidan kula hadlayo, laakiin... hadal! Aniguna markaas dabadeed ayaan kuu sheegi doonaa! Wax walba ayaan kuu sheegi doonaa."

"Waad ii naxaysaa, Nastenka, waad ii naxaysaa oo keliya, saaxiibteydii yarayd ee qaaliga ah! Wixii dhacay dib looma sixi karo. Wixii la yidhi dib loogama noqon karo. Sow sidaas ma aha? Haddaba hadda waad ogtahay. Halkaas ayaynu ka bilaabaynaa. Waa hagaag. Hadda wax walba way hagaagsan yihiin, ee i dhegayso.

Markii aad halkaas fadhiday adigoo ooyaya. Waxaan is iri—Ah, bal aan kuu sheego waxa aan markaas ka fikirayay!—waxaan is iri, inkastoo, dabcan, aysan taasi suurtagal ahayn, Nastenka. Waxaan is iri waxaa laga yaabaa inaad... waxaan is iri waxaa laga yaabaa inaad si uun... aniga oo aan arrinta ku lug lahayn, joojisay inaad isaga jeclaato.

Markaas—shalay iyo maalintii ka horreysay ayaan sidaas u malaynayay, Nastenka—markaas waxaan... hubaal waxaan ku guulaysan lahaa inaan kaa dhigo inaad i jeclaato; adiga qudhaada ayaa tidhi, Nastenka, inaad ku dhowaatay inaad i jeclaato.

Haddaba maxaa xiga? Hagaag, taas waa waxa keliya ee aan rabay inaan kuu sheego; waxa hadhay oo keliya waa inaan kuu sheego sida ay wax ahaan lahaayeen haddii aad i jeclaan lahayd—intaa oo keliya, wax ka badan ma aha!

I dhegayso, saaxiibtey—waayo si kasta ha ahaatee, saaxiibtay baad tahay—dabcan waxaan ahay nin miskiin ah, aan kibir badnayn,

oo aan qiimo weyn lahayn; laakiin taasi ma aha waxa muhiimka ah. Xataa uma muuqdo inaan awoodayo inaan kuu sheego waxa aan dhab ahaan ula jeedo, Nastenka, aad baan u wareersanahay.

Waxa keliya ee aan ogahay waa inaan ku jeclaan lahaa. Xataa haddii aad weli isaga jeclaan lahayd. Xataa haddii aad sii jeclaan lahayd ninkaas, weligaa maad dareemi lahayn in jacaylkaygu culays kugu yahay.

Waxaad daqiiqad kasta dareemi lahayd in dhinacaaga uu kaa jiro qof leh qalbi wanaagsan, mahadnaq badan, qalbi diirran oo diyaar u ah inuu wax walba kuu sameeyo...

Alla, Nastenka, Nastenka! Maxaad igu samaysay?"

"Ha ooyin; ma doonayo inaad ooydo," ayay tidhi Nastenka iyadoo si degdeg ah uga soo kacaysa kursigii. "Kaalay, soo kac, ila soo soco, ha ooyin, ha ooyin," ayay tidhi iyadoo marada yar indhaha iskaga tirtiraysa ilmada. "Hadda aynu tagno; waxaa laga yaabaa inaan wax kuu sheego... Haddii uu hadda iga tagay, haddii uu i illoobay, inkastoo aan weli isaga jeclahay—ma doonayo inaan ku khiyaaneeyo—laakiin i dhegayso, iiga jawaab. Haddii aan ku jeclaan lahaa, tusaale ahaan, haddii aan kaliya... Ah, saaxiibkay, saaxiibkay! Bal ka fikir, bal ka fikir sida aan kuu dhaawacay, markii aan ku qoslay jacaylkaaga, markii aan kugu ammaanay inaadan i jeclaan. Alla, Ilaahayow! Sidee bay ku dhacday inaanan arrintan sii odorosin, sidee bay ku dhacday inaanan sii odorosin, sideese sidaas nacasnimo ugu noqon karayay? Laakiin... Hagaag, go'aankaygii waan gaaray, waan kuu sheegayaa."

"Bal eeg, Nastenka!, Waan tegayaa, saas ayaan samaynayaa. Keliya waan ku cadaadinayaa oo ku dhibayaa. Adigu waxaad hadda ka shallaynaysaa inaad igu qososhay, mana doonayo inaan... weliba adiga oo murugaysaan... Dabcan, anigaa khaladka leh, Nastenka, laakiin nabadgelyo!"

"Joog, i dhegayso: ma sugi kartaa?"

"Maxaan sugaa?"

"Waan jeclahay isaga; laakiin waan ka gudbi doonaa, waa inaan ka gudbaa, suurtagalna ma aha inaan ka gudbi waayo; waan ka gudbayaa, taas waan dareemayaa... Yaa og? Waxaa laga yaabaa inay wax walba maanta dhammaadaan, waayo waan necbahay isaga, waayo wuu igu maadsaday, adiguna halkan ayaad ila ooyaysay; waayo adigu ima aadan diidin sidii uu isagu ii diiday; waayo adigu waad i jeceshahay, isaga se waligiis ima jeclaan; waayo, dhab ahaantii, aniguba waan ku jeclahay...

Haa, waan ku jeclahay! Waxaan kuu jeclahay sida aad adigu ii jeceshahay; horay ayaan kuugu sheegay, adiga qudhaada ayaana maqashay—waan ku jeclahay, waayo isaga waad ka wanaagsan tahay, waayo isaga waad ka sharaf badan tahay, waayo, waayo isaga—"

Dareenka gabadha miskiinta ahi aad buu u xoog badnaa, ilaa ay hadal dambe kari wayday; madaxeedana waxay saartay garabkayga, dabadeedna laabteyda ayay ku tiirsatay, iyadoo si qadhaadh u ooyaysa.

Waan u qalbi qaboojiyay, waan dejiyay, laakiin oohinteeda ma joojin karin; gacantayda ayay mar kasta cadaadinaysay, iyadoo inta u dhexaysa baroorta dhahaysa:

"Sug, sug, daqiiqad yar ayay qaadanaysaa! Waxaan rabaa inaan kuu sheego... waa inaadan u malayn in ilmadan—waxba ma aha, waa tabardarro oo keliya, sug inta ay iga dhammaanayaan..."

Ugu dambayntii oohintii way ka joogsatay, indhaheedana way qalajisay, dabadeed mar kale ayaynu socodkii sii wadnay. Waxaan doonayay inaan hadlo, laakiin weli way iga baryaysay inaan sugo. Aamusnaan ayaynu ku soconnay...

Ugu dambayntii way dhiirratay oo hadal ayey bilowday.

"Arrintu waa sidan," ayay ku bilowday cod daciif ah oo gariiraya, kaas oo haddana lahaa cod macaan oo qalbigayga si macaan leh u milay. "Ha u malayn inaan ahay qof fudud oo aan go'aan lahayn; ha u malayn inaan sidaas si dhakhso ah wax u illoobi

karo oo dareenkaygana beddeli karo. Sannad dhan ayaan isaga jeclaa, Ilaahayna waxaan ugu dhaaranayaa inaan waligay, waligay. Xataa aan ku fikirin inaan isaga khayaamo!

"Wuu i quudhsaday, wuu igu maadsaday—Ilaahay ha u dambi dhaafo! Laakiin wuu i yasay, qalbigaygana wuu dhaawacay. Anigu... anigu ma jecli isaga, waayo waxa keliya ee aan jeclaan karo waa qof qalbi nadiif ah leh, qof i fahmaya, qof deeqsi ah; aniguba sidaas baan ahay, isaguna ima istaahilo—haddaba isaga intaas ha inagu dhaafo.

"Waxa uu sameeyay aya ka wanaagsan inuu gadaal iga khiyaameeyo rajadaydii, dabadeedna goor dambe i tuso qofka uu dhab ahaan yahay... Hagaag, way dhammaatay!

"Laakiin yaa og, saaxiibkayga qaaliga ah," ayay hadalkii sii waday iyadoo gacantayda cadaadinaysa, "yaa og, laga yaabee in jacaylkaygii oo dhan uu ahaa dareen qaldamay, dhalanteed—laga yaabaa inuu ku bilowday ciyaar iyo wax aan macno lahayn, sababtoo ah ayeeyday si aad ah ayay ii xannibi jirtay? Waxaa laga yaabaa inaan jeclaado nin kale, oo aan isaga ahayn, nin ka duwan, kaas oo ii naxariisan lahaa oo... oo...

"Laakiin yaanan arintaas ka sii hadlin," ayay Nastenka hadalkii ku joojisay, iyadoo neeftu ku dheggen tahay, "waxa keliya ee aan rabay inaan kuu sheego... waxaan rabay inaan kuu sheego in haddii, inkastoo aan isaga jeclahay—maya, aan jeclaa—haddii, iyadoo ay sidaas tahay, aad weli tidhaahdo...

"Haddii aad dareemayso in jacaylkaagu sidaas u weyn yahay oo uu ugu dambayn qalbigayga ka saari karo dareenkii hore—haddii aad ii naxariisan doonto—haddii aadan doonayn inaad keligay iga tagto anigoo qaddarkayga wajahaya, rajo la'aan, niyad sami la'aan—haddii aad diyaar u tahay inaad mar walba ii jeclaato sida aad hadda ii jeceshahay—waxaan ku dhaaranayaa in abaalka... in jacaylkaygu ugu dambayn uu u qalmi doono jacaylkaaga...

"Gacantayda ma qabanaysaa?"

“Nastenka!” ayaan ku qayliyay anigoo baroortu neefta iga goynayso. “Nastenka, Ah Nastenka!”

“bas intaas nagu filan! Hagaag, hadda wax walba waa sidaan rabnay,” ayay tidhi iyadoo si dhib leh isu xakamaynaysa. “Hagaag, hadda wax walba waan ka hadalnay, sow sidaas ma aha! Sow sidaas ma aha? Adigu waad faraxsan tahay—aniguna waan faraxsanahay. Hal eray oo kale yaynaan ka odhan arrintaas, sug; ii naxariiso... wax kale ka hadal, Ilaahay dartii.”

“Haa, Nastenka, haa! Intaas baa naga badan, hadda waan faraxsanahay Anigu—Haa, Nastenka, haa, aynu wax kale ka hadalno, aynu si degdeg ah mawduuc kale uga hadalno. Haa! diyaar ayan u ahay.”

Mana garanayn waxaan nidhaahno: waan qosolnay, waan ooynay, kumannaan waxyaalood oo aan macno iyo isku xidhnaan toona lahayn ayaan iska nidhi; mar waxaan ku soconnay jidka laamiga ah, dabadeed si kedis ah ayaan dib ugu soo jeesanay oo jidka ka gudubnay; haddana waan istaagnay, dabadeed mar kale ayaynu dib ugu noqonay jiinka webiga; waxaan ahayn sida carruurta.

“Hadda kaligay ayaan noolahay, Nastenka,” ayaan hadalka ku bilaabay, “laakiin berri! Dabcan waad ogtahay, Nastenka, inaan sabool ahay; waxaan haystaa oo keliya kun iyo laba boqol oo ruble, laakiin taasi waxba ma aha.”

“Dabcan ma aha, ayeeydeyna waxay leedahay hawlgabkeeda, sidaas darteed culays nagu noqon mayso. Waa inaan ayeeyo soo kaxaysannaa.”

“Dabcan waa inaan ayeeyo soo kaxaysannaa. Laakiin Matrona aya ila joogta “

“Haa, anigana Fyokla ila joogta!”

“Matrona waa haweenay wanaagsan, laakiin hal cillad ayay leedahay: mala-awaal ma leh, Nastenka, haba yaraatee; laakiin taasi waxba ma aha.”

"Taasi wax dhib ah ma leh—labadooduba way wada noolaan karaan; laakiin berri waa inaad gurigeenna u soo guurtaa."

"Gurigiinna? Sidee?"

"Haa, qol naga kirayso. Dabaqa sare ayaan leenahay, waana bannaan yahay. Waxaa halkaas deggenayd haweenay duq ah, laakiin way guurtay; ayeeyaydayna waxaan ogahay inay jeclaan lahayd nin dhallinyaro ah inuu guriga nala dego. Waxaan ku idhi,'Maxaad nin dhallinyaro ah u rabtaa?' Waxayna tidhi, 'maandhe, gabadhaydi waan gaboobay; laakiin ha u malayn, Nastenka, inaan u doonayo inuu kuu noqdo nin aad guursato.' Markaas ayaan gartay inay sidaas ula jeeddo."

"Ah yaa, Nastenka!"

Labadeenuba waan qosolnay.

"Kaalay, intaas noogu jooji, intaas waa nagu filan tahay. Laakiin xaggee baad degan tahay? Waan illoobay."

"Dhinacaas, meel u dhow buundada X, Dhismayaasha Barannikov."

"Ma gurigaas weyn baa?"

"Haa, gurigaas weyn."

"Ah, waan aqaan, waa guri wanaagsan; laakiin waad ogtahay. Waxaa kuu wanaagsan inaad ka guurto oo sida ugu dhakhsaha badan noogu soo guurto."

"Berri, Nastenka, berri; wax yar ayaan kirada uga leeyahay halkaas, laakiin taasi waxba ma aha. Dhawaan ayaan mushaharkayga qaadanaya."

"Ma ogtahay, laga yaabee inaan casharro bixiyo; wax baan aniguba baran doonaa, dabadeedna casharro ayaan bixin doonaa."

"Waa hagaag! Aniguna dhawaan gunno ayaan heli doonaa."

"Haddaba berri waxaad noqonaysaa kiraystahayga."

"Waxa kale oo aynu tegi doonnaa *Timo-jareha Seville*, waayo dhawaan ayay mar kale soo bandhigayaan."

"Haa, waynu tegi doonnaa," ayay tidhi Nastenka, "laakiin waxaa ka wanaagsan inaan wax kale daawanno, oo aanan tegin *Timo-jareha Seville*."

"Hagaag, wax kale. Dabcan taas ayaa ka sii wanaagsan; anigu kama aanan fikirin—"

Intaan sidan u wada sheekaysanaynay, waxaynu ku soconnay sidii qof riyo ku jira, sidii qof sarkhaansan, iyadoo ay nala ahayd inaynaan garanayn waxa nagu dhacaya.

Mar ayaan istaagnay, muddo dheerna isla meeshaas ayaan ku wada sheekaysanay; dabadeed mar kale ayaynu socodkii sii wadnay, Ilaahay baa og meelihii aynu gaadhnay; haddana illin, haddana qosol. Si kedis ah ayay Nastenka u rabtay inay gurigeeda aaddo, aniguna kuma dhiirranayn inaan sii haysto, laakiin waxaan doonayay inaan guriga geeyo; markaas ayaynu dhaqaaqnay, rubuc saac gudihiina waxaynu isku aragnay jiinka webiga, kursigeennii agtiisa.

Markaas ayay taahday, illin aya mar kale indhaheeda ku soo istaagtay; aniguna cabsi iyo argagax ayaan la gariiray... Laakiin gacantayda ayay cadaadisay, waxayna igu qasabtay inaan socdo, inaan hadlo, inaan sidii hore u sheekeeyo oo aan hadal badan isku nidhaahno.

"Ugu dambayntii waa waqtigii aan guriga tegi lahaa; waxaan filayaa inay goor dambe tahay," ayay Nastenka ugu dambayntii tidhi. "Waa inaan joojinnaa carruurnimada."

"Haa, Nastenka, laakiin caawa ma seexan doono; guriga ma aadayo."

"Aniguna uma malaynayo inaan seexan doono; laakiin guriga i gee."

"Dabcan!"

"Laakiin markan runtii waa inaan guriga gaadhnaa."

"Waa inaan gaadhnaa, waa inaan."

"Ma ballan adag?"

"Waad ogtahay, mar uun waa in guriga aadnaa!"

"Ballan adag," ayaan ugu jawaabay anigoo qoslaya.

"Haddaba, kaalay!"

"Kaalay isoo raac! Bal fiiri cirka, Nastenka. Eeg! Berri maalin qurux badan ayay noqon doontaa; bal fiiri cirka buluugga ah, dayaxana Eeg; daruurtaas huruudda ahi hadda ayay qarinaysa, bal eeg, eeg! Maya, way dhaaftay. Eeg, eeg!"

Laakiin Nastenka ma eegin daruurta; iyadoo aamusan ayay taagnayd, sidii qof dhagax laga dhigay. Daqiiqad ka dib ayay si xishood leh iigu soo dhowaatay. Gacanteedu way gariiraysay iyadoo gacantayda ku jirta; waan eegay. Weli si dhow ayey igu soo dhowaatay.

Isla markaas nin dhallinyaro ah ayaa waddada so maray. Si kedis ah ayuu u istaagay, wuu nagu dhaygagay, dabadeed dhawr tallaabo ayuu noo soo jirsaday. Wadnahaygu wuxuu bilaabay inuu si xoog leh u garaaco.

"Waa kuma, Nastenka?" ayaan si hoose u idhi.

"Waa isaga," ayay iyaduna si hoose iigu jawaabtay, iyadoo weli si saaid ah igu soo dhowaanaysa, jidhkeeduna aad u gariirayo...

Cagahayga si dhib leh ayaan ugu taagnaa.

"Nastenka, Nastenka! Adiga miyaa!" ayaan maqlay cod gadaashayada ka imanaya, isla waqtigaasna ninkii dhallinyarada ahaa dhawr tallaabo ayuu xaggayaga u soo qaaday.

Ilaahayow, sida ay u qaylisay! Sida ay u boodday! Sida ay gacmahayga uga dhex baxday oo ay ugu carartay inay la kulanto isaga! Aniguna waan istaagay oo waan eegayay, anigoo gebi ahaanba burburay.

Laakiin iyadoo aan weli gacantiisa si buuxda u qaban, iyadoo aan weli isku tuurin laabtiisa, ayay mar kale xaggayga u soo jeesatay; ilbidhiqsi gudaheed ayay haddana dhinacayga joogtay, ka hor intaanan garan waxa dhacaya ayay labada gacmood qoortayda ku duubtay, waxayna i siisay dhunkasho diirran oo kalgacal leh.

Dabadeed, iyada oo aan hal eray i odhan, ayay haddana u carartay isaga, gacantiisana qabatay, dabadeedna iyada oo aan gadaal soo fiirin ayay la dhaqaaqday.

Muddo dheer ayaan halkaas taagnaa, anigoo fiirsanaya iyaga. Ugu dambayntiina labadooduba indhahayga ayay ka sii libdheen.

SUBAXDII

Habeenkaygii wuxuu ku idlaaday aroortii. Waxay ahayd maalin qoyan. Roob ayaa da'ayay oo si aan kala joogsi lahayn u garaacayay muraayadda daaqaddayda; qolka guduhu wuxuu ahaa mugdi, dibadduna waxay lahayd jawi murugaysan. Madaxa ayaa i xanuunayay iyadoo uu wareer i hayay; qandho ayaana si aan la dareemin ugu soo faafaysay jidhkayga.

"Waraaq ayaa kuu taalla, mudane; ninka boostada ayaa keenay," ayay tiri Matrona iyadoo igu soo foorarsanaysa.

"Waraaq? Kuma ka timid?" ayaan ku qayliyay anigoo ka soo booday kursigaygii.

"Ma ogi, mudane. Waxaa wanaagsan inaad eegto—malaha way ku qoran tahay meesha ay ka timid."

Waxaan furay bashqaddii waraaqda. Waxay ka timid iyada!

* * * * *

"Ah, i cafi, i cafi! Jilbaha ayaan ku haystaa ee fadlan i cafi! Adiga iyo naftaydaba waan khiyaamay. Waxay ahayd riyo, dhalanteed... Maanta qalbigaygu adiga ayuu kuu xanuunayaa; i cafi, i cafi!

"Ha igu eedayn, waayo haba yaraatee kuuma aanan beddelin. Waxaan kuu sheegay inaan ku jeclaan doono, haddana waan ku jeclahay. Xataa jacaylka waan ka sii gudbay. Alla, Ilaahayow! Haddii aan labadiinaba isku mar idin jeclaan kari lahaa! Ah, haddii aad adigu isaga ahaan lahayd!"

["Ah, haddii uu isagu adiga ahaan lahaa," ayay maskaxdaydu ku celcelisay. Waxaan xusuustay hadalladii aad tidhi, Nastenka!]

"Ilaahay baa og waxa aan hadda kuu samayn lahaa! Waan ogahay inaad murugaysan tahay oo qalbi-jabsan tahay. Waan ku

dhaawacay, laakiin waad ogtahay, marka la is jecel yahay, khaladka si dhakhso ah ayaa loo illoobaa. Adiguna waad i jeceshahay.

"Waad ku mahadsan tahay, haa, waad ku mahadsan tahay jacaylkaas! Waayo xusuustayda ayuu ku noolaan doonaa sida riyo macaan oo sii raagta muddo dheer ka dib marka laga soo tooso; waayo weligay waan xusuusnaan doonaa daqiiqaddii aad qalbigaaga iigu furtay sidii walaal, oo aad si deeqsinimo leh u aqbashay hadiyadda qalbigayga burburay, si aad u daryeesho, u xannaanayso, oo aad u bogsiiso... Haddii aad i cafido, xusuustaada waxaa sii qurxin doona dareen mahadnaq aan dhammaanayn oo aan weligiis naftayda ka tirmi doonin... Xusuustaas waan xafidi doonaa; daacad ayaan u ahaan doonaa, ma khiyaami doono, qalbigaygana ma khiyaami doono: waayo qalbigaygu adigu daacad kuu yahay. Shalay ayuu si dhakhso leh ugu noqday kii uu weligiis lahaa.

"Waynu is arki doonnaa, gurigayaga ayaad iman doontaa, nagama tegi doontid, weligaa waxaad ii ahaan doontaa saaxiib, walaal. Oo markaad i aragto, gacantaada waad ii fidin doontaa... haa? Waad ii fidin doontaa, waad i cafisay, sow ma aha? Sidii hore ma ii jeceshahay?

"Ah, i jeclow, ha iga tegin, waayo hadda aad baan kuu jeclahay, waayo waxaan mudanahay jacaylkaaga, waayo waan u qalmi doonaa... Gacaliyahaygiiyow! Toddobaadka dambe ayaan isaga guursanayaa. Wuu soo noqday isagoo i jecel, weligiisna ima uusan illoobin. Ma ka xanaaqi doontid inaan isaga wax kaaga qoray. Laakiin waxaan rabaa inaan aniga iyo isaga kuu nimaadno oo ku soo booqanno; waad jeclaan doontaa isaga, sow ma aha?

"I cafi, i xusuuso, oo i jeclow,"

"NASTENKA."

Warqaddii ayaan marar badan akhriyey muddo dheer; ilmadu indhahayga ayay si xoog leh uga soo burqatay. Ugu dambayntii gacmahayga ayay ka dhacday, wejigaygana waan qariyey.

"Mudane, mudane" ayay Matrona hadalka ku bilowday.

"Maxaa jira, Matrona?"

"Dhammaan xuubcaarooyinkii saqafka ayaan ka masaxay; hadda aroos waadku qabsan kartaa ama xaflad ayaad dhigan kartaa."

Matrona ayaan eegay. Weli waxay ahayd haweeney xoog badan, da' ahaanna aan aad u weynayn, laakiin ma garanayo sababta ay hal mar maskaxdayda ugu soo muuqatay iyadoo indhaheedu dhalaalkoodii lumiyeen, wejigeeduna laalaabmay, dhabarka u qalloocatay, oo tabar-darro iyo duqnimo la ciirciiraysa...

Ma garanayo sababta aan si kedis ah ugu sawirtay qolkaygii oo iyada oo kale gaboobay. Derbiyadii iyo sagxadihii waxay u ekaayeen kuwo midabkoodu duugoobay; wax walba waxay yeesheen muuqaal wasakhaysan; xuubcaarooyinkiina waxay ahaayeen kuwo ka sii badan sidii hore.

Ma garanayo sababta, laakiin markaan daaqadda eegay, waxay ila muuqatay in gurigii iga soo horjeeday isaguna gaboobay oo duugoobay; in nuuraddii tiirarka ku taalay midab doorsoontay oo burburayso; in geesaha gidaarku ay dildilaaceen oo madoobaadeen; derbiyadii oo ahaa jaalle dhalaalaya oo qoto dheerna ay noqdeen kuwo baro iyo meel-meel midabku ka lumay.

Ama waxaa laga yaabaa in fallaaraha qorraxdu ay si kedis ah daqiiqad uga dhex ifeen daruuraha, dabadeedna mar kale ay ku qarsoomeen roobka, wax walbana indhahayga hortooda ayay haddana duugoobeen; ama waxaa laga yaabaa in sawirka mustaqbalka oo dhan uu hal mar hortayda ka soo muuqday—muuqaal murugo iyo cabsi leh—oo aan is arkay shan iyo toban sano ka dib, anigoo sida aan hadda ahay oo kale gaboobay, isla qolkaas

dhexdiisa, welina sidaas oo kale kaligay ah, Matronana shan iyo tobankaas sano aanay wax caqli ah oo dheeraad ah yeelan.

Laakiin in aan kuu hayo cuqdad, Nastenka! In aan daruur madow ku daboolo farxaddaada degan ee aan dhibaatadu taaban! In aan canaanteyda qadhaadh qalbigaaga murugo ku geliyo, oo aan ku sunteeyo qoomamo qarsoon, una dhigo mid xanuun kuso dhaweeya saacaddii farxaddu kuu timid! In aan hal ubax oo ka mid ah kuwa jilicsan ee aad timahaaga madow ku xardhatay dumiyo, markaad isaga la socoto xaflada guurkiinna...

Ah, marnaba, marnaba ma dhacayso!

Cirkaagu ha safnaado, dhoolla-caddayntaada macaan ha iftiinto, hana ka go'in; barakadu ha kugu soo degto daqiiqaddaas farxadda ah ee aad siisay qalbi kale oo kelinimo ku nool, oo mahadnaq badan!

Alla Ilaahayow, hal daqiiqo oo farxad ah! Miyaanay ku filnayn nolosha qof dhan?

Dhamaad


Habeennadii Caddada waa sheeko gaaban oo ka hadlaysa kelinimada, riyada, jacaylka, iyo rajada qof qalbigiisu muddo dheer ku noolaa adduun uu isagu samaystay.

Habeenno yar gudahood, laba qof oo aan hore isu aqoon ayaa isku hela waddooyinka Petersburg. Midkood wuxuu sannado ku noolaa riyooyin iyo kelinimo; tan kalena qalbigeeda waxaa ku xidhan jacayl ay weli sugayso.

Waa sheeko ku saabsan farxad laga yaabo inay hal habeen oo keliya jirto, balse xusuusteedu ay qofka la sii noolaan karto cimrigiisa oo dhan.

— Fyodor Dostoevsky —

Turjumaadii:
Cabdi Xakiin Sh. Nuur Muuse



“Mararka qaarkood,
hal habeen oo Kaliya ayaa
noloshadda beddeli kara.”
— Fyodor Dostoevsky

9 786034 567892